# QIIMAYNTA SIDA LOO MAAREEYAY JAWAAB-CELINTA COVID-19 EE SOOMAALIYA

## Baaq ku saabsan hufnaan iyo go'aan qaadasho loo dhan yahay




*Somali Public Agenda*
*September 2020*

Mahad Waasuge, Cabdimalik Cabdullahi,
Maxamed Irbad, Farxaan Isxaaq
iyo Maxamed Shariif

Waxaa daabacay Somali Public Agenda, Sebteembar 2020

## Qorayaasha

Warbixintan waxaa wada qoray Mahad Waasuge (Agaasimaha Fulinta, Somali Public Agenda), Cabdimaalik Cabdullaahi (Iskduwaha Barnaamijka iyo Cilmibaare, Somali Public Agenda), Maxamed Irbad (Cilmibaare, Somali Public Agenda), Farxaan Isaaq Yuusuf (Cilmibaare, Somali Public Agenda), iyo Maxamed Shariif (Cilmibaare, Somali Public Agenda).

Warbixintan waxaa tifaftiray Peter Chonka oo bare ka ah King's College London sidoo kalena ah Somali Public Agenda fellow.

**Somali Public Agenda** waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Somali Public Agenda  KM-4, Degmada Waaberi, Muqdisho, Soomaaliya.

Bogga hore: Koox mutadawiciin ah oo ka hawlgalaya xarun wicitaan ee Covid-19 oo ku taalla Muqdisho

Xuquuqda Daabacaadda © Somali Public Agenda 2020
Sawirka hore © Howlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya
Qoraalkan waxaa lagu faafiyey Oggolanshaha Creative Commons
Attribution-Noncommercial-No Derivatives 4.0 International
www.creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/4.0
Waxaa lagala soo degi karaa warbixinta www.somalipublicagenda.org

# Tusmo


Nuxurka Qoraalka .... 4

Hordhac .... 5

Habka cilmibaarista loo sameeyay .... 8

Awoodda qaran ee ka jawaabista fayraska Covid-19 .... 8

Tallaabooyinka maamul .... 14

Isuduwidda, Isgaarsiinta iyo Wadashaqeynta .... 21

Abaabulka Dhaqaalaha .... 24

Gaabiska jira .... 27

Gunaanad .... 28

Talooyin tixgelin muddan .... 29

Tixraac .... 31

## Nuxurka Qoraalka

Markii lagu dhawaaqay kiiskii ugu horreeyay ee Covid-19 in laga helay Soomaaliya, dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada waxay bilaabeen inay dhisaan awooddooda baaritaan iyo daaweyn ee bukaannada uu ku dhacay fasraska. Markii hore, dheecaannada waxaa loo diray dalka dibaddiisa maadaama aysan jirin sheybaar baaritaan Covid-19 ku sameyn karay Soomaaliya. Iyadoo taageero laga helayo hay'adaha caalamiga ah, saddex sheybaar oo ku kala yaalla Muqdisho, Garoowe, iyo Hargeysa ayaa la hawlgeliyey. Tan iyo markaas, maadaama awoodda baaritaan ay korortay, tirada dadka laga helay Covid-19 ayaa sidoo kale kordhay. Isbitaalka Martini wuxuu bilo badan ahaa isbitaalka kaliya dalka guud ahaan oo loo qalabeeyay in lagu daaweeyo bukaannada uu ku dhacay Covid-19 ee ku sugan Muqdisho. Si kastaba ha noqotee, qeyb kamid ah Isbitaalka Banaadir ayaa sidoo kale dhawaan la furay si loogu daaweeyo bukaannada qaba Covid-19. Xarumo lasoo woco ayaa sidoo kale la aasaasay oo ay ka shaqeeyaan mutadawiciin. Tiro xarumo karantiil ah – inkasta oo ay yar yihiin sariiraha yaalla – ayaa laga aasaasay Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka.

Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ee fadhigeedu yahay Muqdisho iyo Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka (Galmudug, Hirshabeelle, Jubaland, Puntland, iyo Dawlad Goboleedka Koonfur Galbeed) waxay qaadeen tallaabooyin lagu xakameynayo faafitaanka cudurka Coronavirus. Tallaabooyinkan waxaa kamid ahaa joojinta duullimaadyada caalamiga ah iyo kuwa gudaha, xiridda iskuullada iyo jaamacadaha, cashuur dhaafka badeecooyinka qaar ee daruuriga ah, bandow habeenkii ah, iyo mamnuucidda soo dejinta Qaadka. Si kastaba ha noqotee, tallaabooyinkan ayaa si liidata loo fuliyay sababtoo ah awoodda fulineed ee hay'adaha dowladda ayaa daciif ah.

Inkastoo Coronavirus uu ku faafay magaalooyin badan, la tacaaliddiisa waxay ku koobnayd magaalooyinka waaweyn. Dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka marka laga reebo Puntland ayaa baaritaannada u dirayay Magaalada Muqdisho. Qalabka baaritaanka sidoo kale waxaa laga heli karay oo kaliya degmooyinka waaweyn ee dowlad-goboleedyada. Dad badan ee uu ku dhacay cudurka ama ku dhintey degmooyinka fog ayaa la gaari kari waayay awoodda dowladda oo liidata awgeed.

Waxaa jiray guddiyo heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ah. Guddiga heer federaal (oo ay xubnihiisu kamid ahaayeen bulshada rayidka, culimada diinta, iyo ganacsatada) waxaa isku dubariday ra'iisul wasaaraha. Inta badan guddiyada dowlad-goboleedyada (marka laga reebo Puntland) waxaa loo dhisay heer wasiir mana aysan ku jirin dad katirsan qeybaha kale ee bulshada. Isuduwidda dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, iyo sidoo kale isuduwidda dowlad-goboleedyada dhexdooda, guud ahaan wuu liitay. Intaa waxaa dheer, hababka xiriirka dadweynaha ee la isticmaalay way kala duwanaayeen. Inkastoo dowladda federaalku baahineysay oo keli ah kiisaska cusub iyo jinsiga iyo da'da dadka laga helay, wasaaradaha caafimaadka ee Puntland iyo Soomaaliland ayaa ku darayay tirada dadka ay baaritaanka ku sameeyeen.

Dhaqaale ayaa laga uruuriyey gudaha iyo dibaddaba si looga jawaabo cudurka faafa ee Coronavirus. Hase yeeshe, la xisaabtanka iyo daah-furnaanta isticmaalka lacagahaas ayaanan ku filneyn. Dowladda federaalka

waxay siisay nus malyuun doolar shanta dowlad-goboleed, laakiin ma jiraan wax caddeyn ah oo ku saabsan sida lacagahaas loogu isticmaalay ka jawaabista Covid-19. Daraasadan waxay ku talinaysaa maalgelinta daryeelka caafimaadka, go'aan qaadashada loo dhan yahay, hagaajinta xiriirka heerarka dowladda, baahinta adeegyada bulshada, iyo hagaajinta hufnaanta iyo isla xisaabtanka ee ka jawaab-celinta dhibaatooyinka.

## Hordhac

Cudurka faafa ee Covid-19 wuxuu noqday khatar caalami ah wuxuuna saameyn ku yeeshay nolosha malaayiin dad ah oo dunida ku nool. Tirakoobyadii ugu dambeeyay (22 Sebteembar 2020) waxay muujinayaan in ka badan 31.2 milyan oo kiisas ah laga helay 235 dal, deegaanno, iyo maamullo; waxaa sidoo kale la rumeysan yahay in ka badan 962 613 qofood inay u dhinteen fayraska.[1]

Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Soomaaliya ayaa xaqiijisay kiiskii ugu horreeyay ee Covid-19 ee dalka gudihiisa 15-kii Maarso 2020. Wuxuu ahaa arday kasoo laabtay Shiinaha. Inkastoo dowladda federaalku aysan shaacin tirada dadka la baaray, haddana dashboard-ka WHO ee Covid-19 wuxuu qoraya in illaa 22-kii Sebteembar, 18,987 qofood la baaray dalka guud ahaan.[2] Dowladda federaalku waxay faafisaa (marka laga reebo marar dhif ah) kaliya kiisaska dadka laga helay, da'dooda iyo jinsiga. Ilaa Sebteembar 22, waxaa jiray 3,465 Kiisas Covid-19 oo laga xaqiijiyey dalka guud ahaan. 490 kamid ah 3,465 ayaa weli qaba fayraska; 2,877 ayaa ka bogsaday halka 98 ay u dhinteen cudurka Coronavirus.

Muqdisho ayaa laga helay tirada ugu badan ee kiisaska Covid-19. Marka loo eego tirada dadka la baaray, 1,535 qofood ayaa laga helay Muqdisho, taasoo la micno ah in dalka intiisa kale lag helay 1,930 kiis. 61 qofood oo Muqdisho ku nool ayaa weli qaba; 1,419 ayaa soo kabsaday; 55-na way dhinteen. Dadka weli qaba ayaa sidoo kale ku nool dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo Jamhuuriyadda iskeed ugu dhawaaqday madaxbannaanida ee Soomaaliland. Sababta kiisaska Muqdisho ay aad uga sareeyaan dalka intiisa kale ayaa la rumeysan yahay inay tahay (i) in dadka ku nool Muqdisho keliya ay ka badan yihiin 2 milyan; iyo (ii) in in ay goobta uu ku yaallo shaybaarka dowladda dhexe ay tahay Muqdisho. Waxaa sidoo kale la rumeysan yahay in awoodda baaritaanka oo yar awgeed, tirada dhabta ah ee kiisaska coronavirus ee Soomaaliya ay aad uga badan tahay tan ay soo sheegtay Wasaaradda Caafimaadka ee Federaalka.

[1] Eeg xogta Covid-19 ee website-ka WHO https://www.who.int/emergencies/diseases/novel-coronavirus-2019

[2] Dashboard-ka WHO waxaa laga eegi karaa halkan https://bmgf.maps.arcgis.com/apps/opsdashboard/index.html#/d0d9a939c5fa401caa3a7447e72b2017

**Jadwalka 1-aad: Xog kooban ee COVID-19 iyo Soomaaliya [oo ay ku jirto Soomaaliland] (22 Sebteembar 2020)**

| | Tirada la xaqiijiyey | Tirada uu weli hayo | Tirada soo bogsatay | Dhimasho |
|---|---|---|---|---|
| **Benaadir** | 1,535 | 61 | 1,419 | 55 |
| **Soomaaliland** | 934 | 123 | 780 | 31 |
| **Puntland** | 496 | 232 | 255 | 9 |
| **Jubaland** | 212 | 49 | 162 | 1 |
| **Koonfur Galbeed** | 144 | 2 | 142 | 0 |
| **Galmudug** | 119 | 21 | 97 | 1 |
| **Hirshabeelle** | 25 | 1 | 22 | 1 |
| **Wadarta** | 3,465 | 490 | 2,877 | 98 |

**Xigasho: Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Soomaaliya**

Awoodda lagu tijaabiyo Covid-19 ayaa kordhay. Garowe ayaa laga hirgeliyay shaybaar ay taageereen hayadaha UN-ka – UNFPA iyo WHO – (UNFPA, 2020). Waxay u badan tahay in tirada badan ee Covid-19 ah oo ka jira Puntland (marka loo eego Dawladaha kale ee xubnaha ka ah Federaalka) ay ugu wacan tahay awooddeeda baaritaan oo ka fiican dowlad-goboleedyada kale. Si kastaba ha noqotee, dowladda federaalku waxay dhowaan casriyeysay shaybaarrada lagu baaro cudurka qaaxada ee dowlad-goboleedyada, waxayna hadda sameyn karaan baaritaanno Covid-19, inkasta oo ay tirada ay maalintii sameyn karaan ay yar tahay. Marka laga reebo awoodda baaritaanka, waddanku sidoo kale ma lahan awood uu uga jawaabo fayraska. Waxaa jira la'aanta xarumo karantiil (18 keliya ayaa waddan oo dhan ka jira), yaraanta shaqaalaha caafimaadka, xirmooyinka baaritaanka oo xaddidan, qalabka neefsashada, iyo qalabka ilaalinta qofka iyo kuwa kale.

Si loo yareeyo faafitaanka fayraska, dowladda federaalka ayaa qaaday tallaabooyin lagu xakameynayo. Dowladda ayaa hakisay duulimaadyadii caalamiga ahaa iyo kuwii gudaha. Waxay kaloo xirtay iskuullada iyo jaamacadaha. Bandow habeenkii ah ayaa lagu soo rogay magaalada Muqdisho, Wasaaradda Maaliyadduna waxay ku dhawaaqday in cashuur dhaaf loo sameynayo badeecadaha daruuriga ah si looga fogaado kororka qiimaha cuntada. Tallaabooyin waxaa sidoo kale qaaday qaar kamid ah Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka sida joojinta Qaadka kasoo gala dalalka deriska ah ee Itoobiya iyo Kenya, la socodka dhaqdhaqaaqa xuduudaha, iyo qabashada howlo wacyigelin ah ee Covid-19.

Sikastaba ha noqotee, fayrasku wuxuu ku faafay waddanka oo dhan. Baabuurta dadka u kala gudbiya magaalooyinka ayaa sii waday sidoo kalena kordhiyey shaqadooda inta lagu gudajiray Covid-19 sida ay xaqiijiyeen dad kala duwan oo la hadlay cilmibaareyaasha Somali Public Agenda. Ma jiro hay'ad dawladeed – federaal ama gobol – oo isku dayday ama ku guuleysatay inay joojiso isusocodka gaadiidka gudaha. Wacyigelinta bulshada ee astaamaha iyo tallaabooyinka ka hortagga Covid-19 ayaa weli hooseeysa. Waxaa jira ceebeyn bulsho oo la xiriirta coronavirus, dad badana way iska ilaaliyeen inay sheegaan inay qaadeen fayraska (Irbad, 2020). Intaa waxaa sii dheer, salaadaha jameecada lagama mamnuucin inta badan magaalooyinka.

Covid-19 wuxuu soo bandhigay daciifnimada xiriirka heerarka kaladuwan ee dowladda Soomaaliya. Dowladda federaalka waxay aasaastay Guddi Qaran ee Kahortagga Covid-19 oo uu madax u yahay raiisul wasaarihii hore Xasan Cali Khayre. Waxaa sidoo kale jira guddiyo heer wasiir iyo kuwo farsamo oo ka jira shanta dowlad-goboleed. Si kastaba ha noqotee, iskuduwidda latacaalidda Covid-19 iyo baahintiisa degmooyinka ayaanan u muuqan mid si wanaagsan la isugu duubay.

Dowladda federaalka waxay ka heshay taageero UN-ka iyo hay'adaha kale ee caalamiga ah iyo dalalka saaxiibada la ah. Waxay sidoo kale dib-u-eegis ku sameysay miisaaniyad sanadeedkeeda waxana ay ku dartay lacago loogu talogalay ka jawaabista Covid-19 miisaaniyada qaranka. Warbixintani waxay falanqeyneysaa sida dadaallada jawaabcelinta ee Covid-19 loo maareeyay heer federaal, doorka dowladaha xubnaha ka ah federaalka Soomaaliya, baahinta ka jawaabista ee heerarka degmooyinka, iyo wax-kutallaabooyinka maamul ee la adeegsaday.

Guud ahaan, cilladaha ka imanaya jawaabcelinta dowladnimo ee Covid-19 ee Soomaaliya ee lagu xusay warbixintan ayaa inta badan xiriir la leh kala qeybsanaan siyaasadeed oo ka dhashay hannaanka curdanka ah ee federaaleynta Soomaaliya oo ay kamid yihiin hardanka u dhexeeya Dowladda Federaalka ee Muqdisho iyo dowlad-goboleedyada; kala qeybsanaanta dowlad-goboleedyada; iyo meeqaamka goonida ah ee Soomaaliland, oo ku dhawaaqday madaxbannaani oo aan kamid ahayn nidaamka federaalka. Maareynta guud ee dowladda federaalka Soomaaliya ama dowladaha xubinta ka ah Federaalka sidoo kale waxaa caqabad ku ah walaac xagga amniga ah, iyo awood la'aanta dowlad-goboleedyada in ay maareeyaan goobo ka baxsan caasimadaha dowlad-goboleedyada ama xitaa joogitaanka degmooyin badan. Meelahaas, colaadaha had iyo jeer way socdaan, kooxaha kale ee hubaysan, oo ay ugu horreeyaan al-Shabaab, ayaana ku badan. Si lamid ah xaaladaha degdegga ah ee kale oo ay Soomaaliya sida joogtada ah u wajahdo, Covid-19 wuxuu banaanka soo dhigay caqabado badan oo hortaagan qaab-dhismeedka maamul ee nidaamka federaalka ee weli curdanka ah.

Dadaallada lagu doonayo in lagu xakameeyo fayraska waxaa sidoo kale ay saameeyey aragtida muwaadiniinta iyo shakhsiyaad ka tirsan dowladda ee ah in Covid-19 aanu khatar weyn ku ahayn Soomaalida. Marka la tixgeliyo arrimaha kale ee muddada dheer ee bani'aadamnimada, caafimaadka bulshada, iyo arrimaha saboolnimada la xiriira ee oo ay wajahayaan dadka Soomaaliyeed, layaab ma leh in dadka qaar (oo ay ku jiraan siyaasiyiinta) aanay u arkin Covid-19 inuu yahay halista ugu weyn. Si kastaba ha noqotee, baaxadda dhabta ah ee faafitaanka Covid-19 iyo tirada dhimashada Soomaaliya lama ogaan karo, tani lafteeda waxay la xiriirtaa awoodda ay dowladdu u leedahay ururinta xogta iyo la socoshada fayraska. Maaddaama masuuliyiintu aanay lahayn awood ay si baaxad weyn, baaritaan ballaaran oo nidaamsan ugu sameyaan, tirada guud ee la soo sheegay ee fayraska iyo dhimashada ayaa aad uga hooseyn karta xaqiiqda. Aragtida saameynta ugu yar (wakhtiga warbixintan la qoray, dhimashada rasmiga ah ee la xaqiijiyey waa 98) ayaa laga yaabaa in lafteeda loola jeedo in jilayaashu aysan mudnaan siinin jawaabaha kahortagga, ama ay ku guuldareysteen inay sii wadaan howlihii la bilaabay. Tan waxaa laga yaabaa inay u oggolaatay fayraska inuu sii faafo iyadoo aan

la ogaan. Sidaas darteed, waxaa jira waxyaabo badan oo aanan ka ogeyn saameynta dhabta ah ee uu Covid-19 ku leeyahay Soomaaliya, waana in arrimahaas la tixgeliyaa marka la qiimeynayo jawaabaha laga bixiyey heer federaal, heer dowlad-goboleed, iyo heer degmo.

## Habka cilmibaarista loo sameeyay

Si loo fahmo maamulka iyo baahinta ka jawaab celinta Covid-19 ee Soomaaliya, machadka Somali Public Agenda (SPA) waxa uu wareysiyo la yeeshay wakiillada dowladda ee ay khuseyso. Cilmibaarayaasha machadka waxay wareysteen 18 xog-ogaal oo ay kujiraan siyaasiyiin iyo shaqaalaha rayidka heer federaal, heer gobol, iyo heer degmo intii u dhexeysay Abriil iyo Maajo 2020.

Saraakiisha la shaqeysa Wasaaraddaha Caafimaadka ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed, wakiilo ka tirsan wasaaraddaha arrimaha bini'aadanimada ee dowlad goboleedyada, wakiilo ka tirsan wasaaradaha warfaafinta, saxafiyiinta, shaqaalaha gargaarka, iyo wakiilo ka tirsan ururada dhaqaatiirta ayaa la wareystay si loo fahmo dadaallada socda ee heer gobol iyo heerka dowladdaha hoose. Wareysiyada waxaa diiradda lagu saaray qaababka maamul ee la adeegsaday, guddiyada isku duwidda ee la dhisay, baahinta ka jawaab celinta coronavirus ee degmooyinka iyo meelaha fogfog, abaabulka dhaqaalaha, iyo tallaabooyinka isla xisaabtanka ee jira.

Cudurka faafa ee Covid-19 awgiis, cilmibaarayaasha SPA waxay ku sameeyeen dhammaan wareysiyada taleefanka. Xogta aasaasiga ah waxaa lagu kabay macluumaad dheeraad ah oo xog ku kordhinayo islamarkaasna xoojiyey wareysiyada.

## Awoodda qaran ee ka jawaabista fayraska Covid-19

Jawaab celinta ugu mug weyn ee Covid-19 waxaa qaaday dowladda federaalka ee xarunteedu tahay Muqdisho. Dowladda federaalku waxay diyaarisay oo qalabeysay Isbitaalka Martini ee magaalada Muqdisho, kaasoo loo asteeyay inuu diiradda saaro daaweynta bukaannada Covid-19 wuxuuna isbitaalka yaalla ilaa 71 sariirood (oo ay ku jiraan sariiraha ICU). Waxaa jira tiro neef caawiye ah (sida uu inoo sheegay xog-ogaal aan wareysannay, waxa yaalla 20 neef caawiye) isbitaalka Martiini ee magaalada Muqdisho, badankoodna waxaa ku deeqay Turkiga iyo hey'adaha Qaramada Midoobay. Dowladda federaalka ayaa dhowaan dayactirtay, qalabaysay kana furtay isbitaalka Banaadir qeyb lagu daweeyo bukaannada Covid-19.

Hawlgalka isbitaalka daaweynta ee Covid-19, si kastaba ha noqotee, ma ahan dadaal dowladda federaalka u gaar ah. Isbitaalka Martiini wuxuu helay raashin qalalan iyo makiinado dharka lagu dhaqo, koronto aan kala go' lahayn, ambalaasyo, iyo xirfadlayaal caafimaad oo ka socda Ex-Digfeer oo hadda loo yaqaan Erdogan Hospital, iyo weliba shakhsiyaad deeq bixiyeyaal ah, shirkado iyo ururo samafal. Awooddiisa oo aad u yar awgeed, isbitaalka Martiini wuxuu keliya qaabilayay bukaanada ugu nugul iyo kuwa xanunka Covid-19 la ild-aran, iyadoo dadka kale lagula taliyay inay is keli yeelaan oo dadka ka fogaadaan.

Dowladda federaalka ayaa sidoo kale sameysay xarun wicitaan. Koox mutadawiciin ah ayaa xarunta ka hawlgalayay 24 saac (saddex gelin oo isbeddel ah oo midkiiba yahay sideed saacaadood), toddobo maalmood usbuucii. Dadku waxay xarunta

kasoo wacayeen dalka oo idil. Tabarucayaashu waxay u kala qeybiynayeen dadka soo waca saddex qeybood: dad u baahan latashi, dad u baahan daaweyn, iyo dad soo wacay xarunta si ay u hubiyaan in lambarku shaqeynayo iyo in kale. Dad xog-ogaal ah oo la wareystay ayaa u sheegay Somali Public Agenda in xarunta wicitaanka ay macluumaadka u gudbiso koox yar oo dhaqaatiir ah oo dabagal ku sameeya macluumaadka.

Saddex shaybaar oo ku yaal Soomaaliya ayaa la awooday in loo isticmaalo baaritaanka Covid-19. Shaybaaradani waxay kala yaallaan Muqdisho, Garoowe (caasimadda Dowlad-goboleedka Soomaaliyeed ee Puntland) iyo Hargeysa (caasimadda Jamhuuriyadda iskeed madaxbanaanida ugu dhawaaqday ee Soomaaliland). Dhawaan, sida aan kasoo xiganay wareysi lala yeeshay agaasime wasaarad caafimaadka,dowladda federaalka waxay ku guuleysatay inay sare u qaaddo awoodda dhowr shaybaarada oo lagu baari jiray qaaxada iyadoo la adeegsanayo Covid-19 software oo la geeyay dowlad-goboleed kasta. In kastoo kuwani aysan ahayn shaybaarrada Covid-19, haddana farsamayaqaannada shaybaarka ee gobollada ayaa baari kara tiro kooban oo kiisaska Covid-19 ee heerarka gobolka ah.

Dowladda federaalka waxay iska ilaalisay inay sii deyso tirada dadka maalin walba la baaro waxayna kaliya shaacisay tirada maalinlaha ah ee kiisaska xanuunka laga helay iyo shax ka kooban jinsiga iyo da'da. Inkasta oo Wasaaradda Caafimaadka qaranka ay shaaciso tirada kiisaska laga helay cudurka ee guud ahaan dalka ka jira, haddana Wasaaradaha Caafimaadka ee Somaliland iyo Puntland waxay si gooni gooni ah u sii daayaan tirada kiisaskooda la baaray, inta xanuunka laga helay, kuwa soo kabsaday, iyo kuwa u dhintayba si kala gaar ah. Kala qaybsanaanta siyaasadeed ee Soomaaliya waxay si cad u saameyneysaa isu soo ururinta iyo daabacaadda tirakoobyada ‘qaran’, taasoo sii murgineysa dadaallada lagu doonayo in lagu fahmo fiditaanka dhabta ah ee Covid-19.

Waxaa la yaab leh in kaydka xogta hay’adda caafimaadka adduunka ee WHO in uu soo saaro tirada kiisaska la baaray oo ay ku jiraan Puntland iyo Soomaaliland. Ilaa Sebteembar 22, kaydka xogta wuxuu diiwaangeliyay 18,987 muunad oo la baaray.[3] Tirakoobyadan, oo dowladda federaalku aysan faafineynin, sababo aan la ogayn dartood, ayaa tilmaamaya in kiisaska xanuunka laga helay (3,465) ay u dhigmaan 18% wadarta guud ee tirada dadka la baaray. Tani waxay muujineysaa awoodda baaritaanka qaranka oo ah mid liidato. In kabadan 12 milyan oo qofood, baaritaanka kaliya 18,987 qiyaastii shan bilood iyo bar guud ahaan dalka waxaa muujineysaa in baaritaan baaxad weyn iyo raadinta xiriirada dadka aysan macquul ka ahayn Soomaaliya. Waxaa kale oo ay xoojineysaa aragtida ah in tirada dadka uu ku dhacay fayraska iyo kuwa ka bogsaday ay aad uga badan yihiin tirooyinka la sheegay.

Maamulka Gobolka Banaadir iyo Dowladda Hoose ee Muqdisho ayaa sidoo kale ka jawaab celiyay fayraska Covid-19. Maamulka waxay soo saareen istiraatiijiyad hagaysa jawaab celinta Maamulka si loo xakameeyo faafidda cudurka. Istaraatiijiyadda maaraynta Covid-19 waxay ka baaraan degtay in la hawlgeliyo Xarun Hawleed Gargaarka Degdegga ah; xakameynta iyo yareynta isugudbinta xanuunka; diirad-saarista ilaalinta

3 Ibid.

kooxaha halista badan wajahayo; xoojinta iyo ballaarinta awoodda nidaamka caafimaadka; blalaarinta isgaarsiinta arrimaha khatarta leh iyo kaqeybgalka bulshada; iyo yareynta cawaaqibka dhaqaale iyo bulsho ee keeni karo cudurka Covid-19.[4] Inkastoo istiraatiijiyaddu iftiimisay soona jeedisay howlo dhowr ah iyo miisaaniyad $35 malyan ah muddo saddex bilood gudahood, helitaanka macluumaadka ku saabsan in lacagtan la helay iyo sida loo isticmaalay lama heli karo.

Intaas waxaa sii dheer, masuuliyiinta dowladda hoose ee Banaadir waxay u qoondeeyeen min 6 shaqaale ah lix xabaalo oo ku kala yaal bartamaha iyo duleedka gobolka Banaadir si ay ula socdaan una joogteeyaan diiwaannada saxda ah ee tirada aaska. Intaa waxaa sii dheer, saraakiisha ka shaqeeya dowladda hoose ee Banaadir ayaa wareysiyada ku sheegay in dowladda hoose ay dejisay tilmaamo la xiriira ka shaqeynta meydadka iyo aaskooda iyo in 40 shaqaale caafimaad ah oo loo tababaray shaqooyinkan. Macluumaadka ku saabsan tirada dadka maalin walba la aaso waxaa lala wadaagayaa kulanka maalinlaha ah ee guddiga coronavirus oo uu shir gudoominayay Ra'iisul wasaarihii hore ee Soomaaliya Xasan Cali Khayre waxaana kasoo qeyb galayay duqa magaalada Muqdisho (oo sidoo kale ah gudoomiyaha gobolka Banaadir). Inkastoo tirooyinka aaska Muqdisho ee lala wadaagay guddiga qaran ee hawlgallada markii hore dadweynahana loosoo bandhigayay, marki dambe waa ay joogsatay. Sababta waxay noqon kartaa in tirada dhimashada la diiwaangeliyey ay yaraatay. Sidoo kale waxaa suuragal ah in dowladda hoose ay joojisay la socodka xabaalaha.

Maamulka Gobolka Banaadir malahan xarumo lagu daaweeyo Covid-19 oo hoos yimaado maamulka. Sikastaba ha noqotee, maamulka wuxuu gacan ka geysataa u gudbinta Isbitaalka Martiini bukaannada ama kiisaska laga shakisan yahay oo laga kala keenay degmooyinka kala duwan ee Banaadir. Maamulka gobolka, gaar ahaan Waaxda Caafimaadka Dadweynaha, waxay bilowday howlo (inta badan wacyigelin ah) sida gacmo dhaqashada, u qeybinta agabyada gacmo dhaqidda qeybaha bulshada ee nugul, isku dayidda inay ka dhaqangeliso kala fogaanshaha bulshada suuqyada qaar, iyo la shaqeynta culimada diinta si ay u taageeraan dadaalladaan. Sikastaba ha noqotee, ololahan wacyigelinta ah uma muuqan inay sii socan kareen waxayna u muuqdaan inay si xowli leh hoos ugu dhaceen bilihii lasoo dhaafay.

Puntland waxay ka samaysay labo xarumood oo dadka lagu hayo magaalooyinka Garoowe iyo waqooyiga Gaalkacayo. Puntland waxay sidoo kale qaaday talaabooyin wax-ku-ool ah oo looga hortagayo faafidda fayraska, sida mamnuucida qaadka ka yimaada wadamada deriska ah, xadididda maraakiibta ka kalumaysata xeebaha Puntland, iyo qaadista olole wacyigelin oo lagu dhiirigelinayo bulshada inay u hoggaansamaan tallaabooyinka ka hortagga xanuunkan.

Bishii Maarso 2020, Puntland waxay dhistay Guddiga Ka-hortagga Coronavirus oo ka kooban afar guddi-hoosaadyo: (1) guddiga xiriirka iyo wacyigelinta bulshada ah; (2) guddi ka shaqeeya amniga; (3) guddiga maaliyadda iyo badeecadaha ka shaqeysa; iyo (4) guddiga isuduwidda. Guddiyada ayaa ka kooban xubno ka tirsan golaha wasiirada iyo sidoo kale kooxaha bulshada rayidka ah,

[4] Benadir Regional Administration Coronavirus (COVID-19) Management Strategy was drafted and adopted soon after the government announced the Coronavirus outbreak in Mogadishu.

oo ay ku jiraan culimada diinta, warbaahinta (kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowliga ah) iyo gudoomiyaha ururka jilayaasha aan dowliga ahayn ee PUNSAA.

Wasaaradda Caafimaadka ayaa sidoo kale tababartay tiro kamid ah shaqaalaha caafimaadka bulshada si ay uga shaqeeyaan ka jawaabida Covid-19. Intaa waxaa sii dheer, Puntland waxay ka heshay shaybaarka Covid-19 hay'adda UNFPA iyo WHO, taasoo dowladda u oggolaatay in Garoowe lagu baaro kiisaska Coronavirus-ka. Puntland waxay sidoo kale magaalada Garoowe ka hirgelisay khadka taleefanka tooska ah (343) oo loogu talagalay wicitaanka Covid-19 oo bilaash ah. Dadka qaar waxay wacaan nambarkan si ay u helaan macluumaad la xiriira Coronavirus. Dadka soo wacaya qaarkood waxay sharraxaan astaamaha ay dareemaan waxayna talo kasoo raadsadaan shaqaalaha xarunta.

Jubaland waxaa soo wajahay culeyska Covid-19 sababo la xiriira qaab-dhismeedka caafimaad oo daciif ah, Soomaaliya oo dhanna ka jira. Gobolku hadda wuxuu heystaa qalabka wax lagu baaro laakiin ilaa iyo dhowaan waxay u dirayeen baaritaanka Muqdishu si loogu baaro. Wasaaradda caafimaadka ee dowlad-goboleedka oo taageero ka heleysa hay'ado kale oo caalami ah ayaa xarumo dadka lagu hayo ah ka sameysay degmooyinka Doolow, Dhoobleey, iyo Kismaayo.

Magaalooyinka muhiimka ah Dowlad Goboleedka Jubaland ee xuduudaha ku teedsan waxaa kamid ah Doolow, Beled Xaawo, Luuq, iyo Dhoobley. Dolow, oo xuduud la leh Itoobiya waxay leedahay hal xarun oo dadka laga shakiyo lagu hayo oo ay taageerto hay'ada Trócaire. Hase yeeshee, kama helin taageerada ku aaddan Covid-19 dowlad-goboleedka Jubaland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya. Ururada caafimaadka ee maxalliga ah, oo gacan ka helaya WHO, ayaa dheecaanno ka qaaday dadka qaba astaamaha, waxaana loo qaaday magaalada Muqdisho si loo baaro. Shaqaalaha caafimaadka ee ka socda Wasaaradda Caafimaadka ee Jubaland iyo Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) ayaa baaritaan ku sameeya dadka safarka ah ee ka gudbaya xadka (International Organization for Migration, 2020). Beled Xaawo, oo xuduud la leh Mandheera, Kenya, waxay leedahay xarun dadka laga shakiyo lagu hayo laakiin aan u dhameystirneyn qalabkeeda shaqaalahuna yaryihiin. Waxaa jira baaritaan laga sameeyo meelaha looga kala gudbo magaalooyinka, dadka safarka ah ee u kala safrayo magaalooyinka waaweyn ee gobolka ayaa lagu baaraa baraka koontorool ee magaalada. Si kastaba ha noqotee, baaritaanka wuxuu ku kooban yahay oo keliya baaritaanka heerkulka qofka. Degmada Dhoobley – oo iyaduna ah magaalo xuduudeed – waxaa lagu baarayay dadka safarka ah ee kasoo gudba Kenya. Socdaalayaasha ka yimid qeybaha kale ee Soomaaliya ayaa sidoo kale la baaraa markay magaalada yimaadaan. Magaaladu waxay leedahay isbitaal dadka laga shakisanyahay lagu hayo oo leh 15 sariirood. Magaalada lagama helin kiisas fayraska covid-19 ilaa hadda. Waxaa jiray kaliya labo kiis oo looga shakiyay xanuunka, oo ay wasaaradda caafimaadka Jubaland oo kaashaneysa WHO, u qaaday magaalada Nairobi ee dalka Kenya si loo xaqiijiyo.

Guud ahaan awooda ka jawaabida Covid-19 ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed way xaddidan tahay, waxay lamid tahay inta badan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka Soomaaliya. Sida lagasoo xigtay

saraakiisha Koonfur Galbeed ee la wareystay, kaliya laba xarumood oo dadka xanuunka looga shakisanyahay lagu hayo ah ayaa ka jira dhammaan degmooyinka maamulka: mid ku yaal Baydhabo iyo mid ku yaal Afgooye. Xarunta dadka xanuunka looga shakisanyahay lagu hayo ee Baydhabo waa Isbitaalka Gobolka Bay, oo ay taageerto Guddiga Caalamiga Laanqayrta Cas (ICRC). Waxay leedahay 8 sariirood oo keliya oo aan lahayn qalab kale sida neef caawiye ama qalabka la socodka bukaanka. Waxa jira labo xarumood oo kale oo ku kala yaal Marka iyo Xudur oo maamulku bilaabay inuu dayactiro.

Awoodda ay Galmudug u leedahay in ay xakameyso xanuunka coronavirus sidoo kale waa daciif. Galmudug ma haysato qalab baaritaan oo lagama maarmaan u ah baaritaanka dadka qaba astaamaha cudurka. Illaa dhowaan, waxay u soo diri jirtay kiisaska Muqdishu. Tani waxay qeyb ka qaadatay kiisaska tirada yar ee lagasoo sheegay Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka inkastoo fayrasku shaki la'aan uu ku dhex faafay bulshada dhexdeeda.

Marka laga hadlayo xarumaha dadka lagu hayo, waxaa jira xarun ku taal Dhuusamareeb oo ay taageerto Hay'ada Caafimaadka Aduunka (WHO) oo leh 18-sariirood. Wasaaradda Caafimaadka ayaa diyaarisay islamarkaana furtay qeyb lagu karantiimeeyo dadka cisbitaalka guud ee Dhuusamareeb oo leh 28 sariirood. Isbitaalka waxaa ka maqan mashiinadii nafta lagu badbaadin lahaa si loola tacaalo xaaladaha adag sida oksijiinta, sariiraha daryeelka degdega ah iyo neef caawiyayaal oo qaali ah oo gabaabsina ku ah guud ahaan dalka. Dowlad-goboleedku wuxuu ugu horreyntii ku tiirsan yahay qalabka laga keeno DFS ee Muqdisho. Waxaa xusid mudan in qayb kale oo dadka lagu hayo laga furay Isbitaalka guud ee Galkacyo (koonfurta) oo leh 17 sariirood, ayna taageeraan NGO-yada Caafimaadka ee ka shaqeeya halkaas. Labo xarumood oo kale oo lagu hayo dadka xanuunka looga shakiyo waxaa aasaasay bulshada ku nool Cadaado iyo Cabudwaaq. Wasaaradda Caafimaadka Federaalka ayaa qalabeysay Xarunta dadka lagu hayo ee Caabudwaaq halka xarunta Cadaado ay taageertay Hay'ada Save the Children. Intaa waxaa sii dheer, si looga hortago faafitaanka fayraska, Wasaaradda Caafimaadka Galmudug ayaa labo koox u dirtay xadka u dhexeeya Galmudug iyo Itoobiya si ay ugu sameeyaan howlo baaritaan ah oo loogu talagalay dadka kasoo gudbaya xadka gobolka.

12-kii Abriil, sarkaalkii ugu horreeyay ee dowladda ee u dhinta cudurka coronavirus wuxuu ahaa wasiiru dowlihii hore ee caddaaladda Hirshabeelle. Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle, oo lamid ah dowlad goboleedyada kale, wuxuu la daala dhacayaa awoodda hay'adeed oo daciif ah oo wax looga qabanayo xanuunkan. Dowlad-goboleedka waxaa si degdeg ah loo aasaasay dabayaaqadii 2016 iyadoo lagu guda jiray doorashooyinkii dadbanaa, kaabayaasheeda hay'adeed ayaa wali ku jira marxalad biloow ah. Sida laga soo xigtay saraakiil ka tirsan Hirshabeelle, waxaa jira hal xarun oo loogu tala galay daaweynta bukaanka Covid-19, oo leh 15-sariirood, iyo hal xarun lagu karantiilo dadka oo leh 16 sariirood oo ku taalla magaalada Jowhar. Maamulka ayaa magaalada Beledweyne ka sameeyay xarun dadka xanuunka looga shakiyay lagu hayo oo u dhow garoonka diyaaradaha, laakiin xaruntan ma shaqeynaynin xilligii la qorayay warbixintan. Awoodda baaritaanka iyo daaweynta ee Hirshabeelle aad ayey u koobantahay. Tan waxaa muujinaya xaqiiqda ah in Hirshabeelle ay kamid tahay

dowlad goboleedyada kiisaska ugu yar laga diiwaan geliyey, inkastoo ay tahay dowlad-goboleedkii ugu horreeyay ee sarkaal dowladeed u dhinto Covid-19. Qalabka baaritaanka sidoo kale waa kooban yahay waxaana laga heli karaa oo keliya magaalooyinka waaweyn sida Jowhar iyo Beledweyne.

**Xarumaha dadka lagu hayo ee Soomaaliya (oo ay ku jirto Somaliland)**

| Magaalada | Goobta dadka lagu hayo | Tirada sariiraha | Hay'ada taageerto |
|---|---|---|---|
| **Baydhabo** | Isbitaalka Guud ee Baay | 8 | ICRC |
| **Dooloow** | Isbitaalka Dooloow | 12 | Trocaire |
| **Hargeysa** | Isbitaalka Guud ee Hargeysa | 4 | Somaliland Ministry of Health |
| **Dhoobleey** | Isbitaalka Dhoobleey | 15 | Save the Children |
| **Kismaayo** | Isbitaalka Guud ee Kismaayo | 13 | ICRC |
| **Muqdisho** | Isbitaalka Martiini | 71 | Wasaaradda Caafimaadka ee Dowlada Federaalka |
| **Baydhabo** | Isbitaalka Degmada ee Baydhabo | 30 | WHO |
| **Hargeysa** | Isbitaalka Daryeel | 42 | Gaar loo leeyahay |
| **Ceerigaabo** | Xarunta Dadka lagu hayo/daaweeyo ee Surud | 2 | Wasaaraddda Caafimaadka Somaliland |
| **Garoowe** | Xarunta dadka lagu hayo ee Garowe | 18 | Wasaaradda Caafimaadka Puntland |
| **Kismaayo** | Xarunta dadka lagu hayo ee Maxfalka | 30 | WHO |
| **Gaalkacyo** | Xarunta dadka lagu hayo ee Galkacyo (Waqooyi) | 20 | Bulshada Deegaanka |
| **Muqdisho** | Isbitaalka Keysaney | 15 | ICRC |
| **Jowhar** | Xarunta dadka lagu hayo ee Jowhar | 16 | WHO |
| **Dhuusamareeb** | Xarunta dadka lagu hayo ee Dhuusamareeb | 28 | WHO |
| **Cadaado** | Xarunta dadka lagu hayo ee Cadaado | 25 | Save the Children |
| **Cabudwaaq** | Xarunta dadka lagu hayo ee Cabudwaaq | 10 | Wasaaradda Caafimaadka ee Dowladda Federaalka |
| **Gaalkacyo** | Xarunta dadka lagu hayo ee Galkacyo (Koonfur) | 17 | IMC |
| **13 magaalo** | 18 xarumo dadka lagu hayo | 376 sariirood | |

## Tallaabooyinka maamul

Ka hortagga faafitaanka Covid-19 waxa ay u baahan tahay go'aamo siyaasadeed iyo hirgelinta tallaabooyin maamul. Inta badan go'aamada maamul waxaa gaarey dowladda federaalka ee xarunteeda tahay Muqdisho. Wax yar kadib markii lagu dhawaaqay in coronavirus laga heley Soomaaliya, 16-kii Maarso, ayaa dowladda federaalka waxaa ay mamnuucday duullimaadyada caalamiga ah ee yimaada Soomaaliya. Mamnuuciddan ayaa yeelatey saameyn siyaasadeed waxayna dib usoo kicisay xiisadihii muddada dheer ka taagnaa maamulka hawada ee u dhexeeyay Soomaaliland iyo dowladda federaalka. Dowladda federaalka ayaa leh aqoonsi rasmi ah oo caalami ah ee madax-bannaanida lagu xukumo Soomaaliya oo dhan oo ay kamid tahay Soomaaliland, oo ah jamhuuriyad is-keed ugu dhawaaqday madaxbanaani, oo aan weli loo aqoonsan dal madax-bannaan, balse dowladdeedu si buuxda u maamusho dhulkeeda. Duullimaadyada caalamiga ah ee ka imaanayay dalka Itoobiya ayaa kusoo degayay Hargeysa inkasta oo ay Wasaarada Duulista ee dowladda federalka Soomaaliya mamnuucday dhammaan duullimaadyada. Dowladda federaalka ayaa sidoo kale jooji-say duullimaadyada maxalliga ah sidoo kalena yareysey duullimaadyada hawada ee safarka gudaha kuna koobtey duullimaady-ada muhiimka ah ee arrimaha gargaarka oo keliya. Bilooyin kadib, duullimaadyadii gudaha ee Soomaaliya waxaa dib loo bilaa-bay 5-tii Luulyo 2020 kadib markii golaha wasiiradu ay go'aamiyeen in dib loo furo duullimaadyada maxalliga ah iyadoo la raacayo tilmaamaha caafimaad ee Covid-19. Si kastaba ha ahaatee, dowladda federaalka iskuma aysan dayin in ay xakameyso safarka waddooyinka. Dad badan oo laga yaabo in uu soo ritey virus-ka iyagoo jooga Muqdisho ayaa ku safray wadada, Coronavirus-kana wuxuu ku faafay degmooyin badan oo ku yaalla Soomaaliya oo adeeggooda caafimaad xaddidan yahay ama aananba laheyn kaa-bayaal caafimaad.

Intaas waxaa sii dheer, Ra'iisul Wasaarihii xilligaas waxaa uu ku dhawaaqay xiritaanka dhammaan iskuullada iyo jaamacadaha dalka. Amarkan waxaa fuliyay dhammaan daneeyayaasha inkastoo macallimiinta iyo maamulka dugsiyadu ay la kulmeen caqa-bado dhaqaale iyo kuwo xaga maareynta imtixaanka ah. Jaamacadaha ayaa la kulma dhibaatooyin baaxad leh oo ku saabsan wax-ku-dhigista habka online- ka ah ee koorsooyinka iyadoo inta badan ay ugu wacan tahay u diyaargarow la'aanta qaabkan waxbarasho, iyo sidoo kale arrimaha la xiriira kaabayaasha ICT iyo isticmaalka ar-dayda (Yusuf, 2020).

Wasaaradda Maaliyaddu ayaa ku dha-waaqday canshuur dhaaf 100% ah ee bar-iiska iyo timirta, iyo canshuur khafiifin 50% ah ee burka qamadiga iyo saliida cuntada. Tani ayaa loo qorsheeyay si loo hubiyo in sicirka cuntada uusan kor u kicin sababo la xiriira yaraanshaha isu socodka iyo xanni-baadda duullimaadyada caalamiga ah (Ab-dullahi & Sharif, 2020). Inkastoo qiimaha cuntadu uusan u kordhin si dhaqsi ah sida dadka qaar ay filayeen, haddana kororka qii-maha cuntada ayaa laga dareemey suuqyada Muqdisho sida qaar kamid ah falanqee-yayaasha ay qabaan (Hassan, 2020).

Tallaabadii ugu muranka badneyd ee maamul ee dowladda federaalka qaadday waxay ahayd bandow habeenkii ah ee Muqdisho lagusoo rogay. Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Korneel Xijaar ayaa ku dhawaaqay bandow habeenkii ah oo ka bilaabanaya 15-ka Abriil saacadu markey

tahay 8:00 fiidnimo kuna eg 5:00 subaxnimo. Bandowga ayaa si habsami leh loo dhaqan geliyey illaa muddo toddobaad ah. Hase ahaatee, markii ay bilaabatay bisha barakeysan ee Ramadaan 24-ka Abriil, Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa uu amar ku bixiyay in wax laga beddelo saacadaha bandowga uu soconayo. Dad badan ayaa filayay in saacadaha bandowga la dhimayo bisha Ramadaan awgeed. Balse taa beddelkeeda, Taliyaha Booliska waxaa uu sheegay in bandowga uu bilaaban doono saacad ka hor jadwalkii hore.

Markii uu bilowday dhaqangalinta bandowga, sarkaal boolis ah ayaa labo qofood oo rayid ah ku toogtay degmada Boondheere. Maalintii xigtay, caro dadweyne iyo banaanbaxyo rabshado wata ayaa dhacay. Dowladdu waxa ay xirtay sarkaalka booliiska ah ee dilay dadka shacabka ah sidoo kale waxay xilka ka qaaddey Taliyihii Booliska degmada Boondheere. Dowlada ayaa sheegtay in jadwalka bandowga uu markale bilaaban doono 8:00 fiidnimo sidii caadada aheyd islamarkaana dadka kaligood socda aan la joojin doonin. Qaadista bandowga lama shaacin ilaa xilligaan warbixinta la qorayo, hase yeeshe hadda lama dhaqangelinayo. Sidoo kale, bandowga waxaa kaliya laga hirgaliyay aagagga caasimada oo ay dowladu ku leedahay awood xoogan sidaa darteedna dhaq dhaqaaqa dadka ee xilliyada habeenkii ah ee degmooyinka duleedyada ku yaalla ma aysan saameyn arrintaan.

Dowladda Hoose ee Muqdisho ayaa shaqaale siisay Isbitaalka Martiini si ay ula wareegaan waajibaadka nadaafadda iyo fayadhowrka ee isbitaalka. Dadaalka muuqda ee Maamulka Gobolka Benaadir waxaa uu ahaa olole ballaaran oo ay kumannaan fool-saab ugu qeybisay dadka deggan gobolka Banaadir si loogu dhiirrigeliyo wadayaasha gaadiidka dadweynaha, kirishbooyada, wadayaasha gawaarida xamuulka, ciidamada amniga iyo shaqaalaha kale ee muhiimka ah inay wejigooda daboolaan. Intaas waxaa dheer, maamulka gobolku waxaa uu bulshada u qeybiyay istiikaro wacyigelin ah iyagoo kaashanaya wasaaradaha warfaafinta, caafimaadka iyo arrimaha diinta.

Si loo xakameeyo faafitaanka Covid-19, Puntland waxa ay ugu horreyn mamnuucday soo degidda doomaha ganacsiga ee ka imanaya Iiraan iyo Jasiiradda Carabta, waxay mamnuucday qaadkii laga keeni jiray Itoobiya, waxa ayna sidoo kale bandow qeyb ahaan ah oo bilaabanaya 7-da fiidnimo kusoo rogtey Boosaaso, Waqooyiga Galkacyo, iyo Garoowe (Majid, et al, 2020). Dhanka wacyigelinta, guddiga Covid-19 ayaa la aasaasay si ay isugu dubaridaan dadaallada wacyigalinta ee ay ka qeyb qaadanayaan qeybaha bulshada rayidka ah, oo ay ku jiraan warbaahinta (kuwa dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay-ba), culimada diinta iyo xirfadlayaasha caafimaadka dadweynaha, si looga digo bulshada khatarta fayraska.

Si wax looga qabto caabuqa sii kordhaya, maamulka Jubaland ayaa ku dhawaaqay in la xirayo dhammaan masaajiddada iyadoo lala kaashanayo culimada diinta. Midda labaad, dowlad goboleedka ayaa dhistay guddi ka kooban wasiirro, saraakiil kale oo dowladda ka tirsan iyo xubno ka socda bulshada rayidka ah. Midda saddexaad, degmooyinka Jubaland iyo maamulada maxalliga ah waxay bilaabeen olole wacyigelin ah oo bulshada lagu barayo astaamaha cudurka iyo tallaabooyinka looga hortagayo qaadista fayraska. Ololahan waxaa wada shaqaalaha caafimaadka ee deegaanka iyo mutadawiciin oo ay taageerayaan Wasaaradda Caafimaadka iyo ururada samafalka. Midda

afaraad, jidadka iyo meelaha muhiimka ah ee bulshada ee ku yaal magaalada Kismaayo ayaa la jeermis diley si loo yareeyo heerarka halista. Midda shanaad, telefishinka dowladda ayaa bilaabey barnaamijyo iyo qoraallo loogu talo galay in lagu ogeysiiyo korna loogu qaado wacyiga bulshada ee ku saabsan coronavirus. Ugu dambeyntiina, Wasaaradda Caafimaadka ee Jubaland, ayaa tababar u siisay koox ka kooban culumaa'udiinka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka, baratakoolka ama nidaamka aasida qofkasta oo la ogyahay ama looga shakiyo inuu u dhintey Covid-19.

Maamulka Koonfur Galbeed, guddi-howleed loo xilsaaray arrimaha Covid-19 oo uu aasaasay madaxweynaha dowlad-goboleedka ayaa diyaariyey istiraatiijiyad isgaarsiineed ama wad xiriir iyo farriimo wacyigelin ah oo lagu baahiyo idaacadaha maxalliga ah, kuwaasoo kala ah Radio Baydhabo, Radio Koonfur Galbeed, Radio Xudur oo ku baxa dhammaan lahjadda maxalliga ah (Maay) iyo sidoo kale telefishinka dowlad-gobolkeedka. Waxaa sidoo kale jiray gawaari ay ku xiran yihiin codbaahiyeyaal lagu duubey fariimo wacyigelin ah oo ka hadlaya Covid-19 ee xaafadaha Xudur iyo Baydhabo. 14-kii Abriil, Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed ayaa si kumeel-gaar ah u joojisey gaadiidkii wadada ka imaan jirey Muqdisho sababo la xiriira fiditaanka Covid-19 ee magaalada Muqdisho si xaaladda gacanta loogu hayo. Si kastaba ha ahaatee, amarkan si wax-ku-ool ah looma hirgelin dhowr sababood awgood. Ugu horreyn, gaadiidka waddooyinka ayaa ka sii shaqeynayay dhammaan qeybaha kale ee dalka iyo ganacsiyada gawaarida xamuulka / basaska Dowlad goboleedka Koonfur Galbeed ayaa ku xirnaa shabakadahaas. Midda labaad, waxaa jiray culeys ka yimid ganacsatada iyo qeybaha kale ee bulshada oo aan haysan gaadiid kale oo degdeg ah islamarkaasna shaqeynaya oo aan ka aheyn isticmaalka waddada. Midda saddexaad, maamulka degmooyinka iyo masuuliyiinta kale dabagal kuma aysan sameyn sidii amarka lagu dhaqangelin lahaa.

Dowlad-goboleedka ayaa sidoo kale xirtay iskuullada, malcaamadaha, iyo goobaha kale ee bulshada isugu yimaadaan iyadoo la raacaayo amarkii Ra'iisul Wasaaraha. Iskuullada, jaamacadaha iyo malcaamadaha way xirnaayeen, laakiin xayiraadda si fiican ugama dhaqan galin meelaha kale ee bulshada ay isugu timaado sababo la xiriira wacyiga dadka ee ku aaddan caabuqaan oo aad u yareyd. Goobaha sida hoteellada iyo makhaayadaha ayaa furnaa, dadkuna waxay sii wateen is-dhexgalkooda bulsho iyo qabsashada kulamada dadweynaha. Maamulka ayaa sidoo kale soo rogay amar bandow 8-da habeennimo ah habeenkii kaasoo khuseeya ganacsiyada, gawaarida iyo bajaajta (inkastoo aan bajaa-jta loo oggoleyn inay shaqeeyaan habeenkii kahor xitaa inta uusan dillaacin fayraska Covid-19). Sikastaba ha ahaatee, tani ayaa dhaqangashey keliya maalmihii ugu horreeyay kadib markii lagusoo rogey magaalada Baydhabo, oo ah xarunta kumeelgaarka ah ee dowlad-goboleedka, taasoo ay midda ugu weyn ee ugu wacan ay tahay awood-yarida fulinta ee booliska iyo hay'adaha maxalliga ah.

Si lamid ah dalka intiisa kale, duulimaadyadii diyaaradaha ee Galmudug waa la joojiyay (marka laga reebo diyaaradaha sida gargaarka caafimaad) taasoo qeyb ka ah tallaabooyinka loogu talagalay in lagu xakameeyo faafitaanka cudurka ee degaannada Galmudug. Tallaabooyinka kale ee uu qaadey maamulka Galmudug waxaa kamid ahaa xiritaanka iskuullada iyo mamnuucidda

xamuulka sida qaadka ee hawada iyo dhulkaba. Hase ahaatee, Galmudug ma aysan ku guuleysan xakamaynta qulqulka xamuulka Qaadka, kaasoo si koontarabaan ah loo keenaayey magalooyinka dowlad-goboleedka sababo la xiriira xuduudaha nugul. Ganacsatada qaadka ayaa ka faaidey badeecadan koontarabaanka ah.

Tani waxaa barbarsocdey in masaajidyada, makhaayadaha iyo meelaha shaaha lagu cabo ay si buuxda u shaqeynayeen oo aysan saameyn ku yeelan xayiraadaha la xiriira coronavirus ee Galmudug. Midda ugu muhiimsan, Wasaaradda Caafimaadka Galmudug waxay baahisay farriimo wacyigelin oo ay u sii marisey xarumaha warbaahinta ee ka howlgala maamulkeeda. Qoraallo yar yar ayaa la qeybiyey sidoo kalena boorar ay ku qoran yihiin fariimo wacyigelin fayraska ah ayaa lagu dhajiyay hareeraha wadooyinka waaweyn iyadoo qeyb ka ah ololaha wacyigelinta. Intaa waxaa sii dheer, Wasaaradda Caafimaadka Galmudug ayaa ka hirgelisay haamo gacmaha lagu dhaqanayo meelaha dadku isugu yimaado iyadoo qeyb ka ah tallaabooyinka ka hortagga ah ee loo qaaday in lagu xakameeyo fayraska. Galmudug ma awoodin inay xaddido gaadiidka safarka dhulka ah. Dawlad-goboleedku ma haysto marin deked weyn waxayna aad ugu tiirsan yahay waxyaabaha laga soo dhoofiyo Muqdisho iyo Puntland waxayna sii wadey ku xirnaanshaha gaadiidka. Tani waxay halis u ahayd u gudbitaanka fayraska ee dowlad goboleedka dhexdeeda, sidaas awgeedna ay wax u dhimayso dadaallada ka hortagga.

Si lamid ah dowlad-goboleedyo badan oo kale, Hirshabeelle waxay xuduud la wadaagtaa Itoobiya. Markii ay dowladda federaalka mamnuucday duulimaadyada caalamiga ah – oo ay ku jiraan qaadkii ka imanayay Kenya – ganacsatada qaadka waxay billaabeen inay qaadka ka keenaan-Itoobiya iyagoo dhulka soo marinaya. Hirshabeelle ayaa ku dhawaaqday amar lagu mamnuucayo qaadka ka yimaada dalka Itoobiya. Si kastaba ha ahatee, maamulka awooddiisa dhaqangelinta oo daciif ah ayaa keentey in qaadka si joogto ah looga cuno dhammaan deegaanada Hirshabeelle ay ka arrimiso, mamnuuciddana ay dhaqangeli weyso. Sababta kale ee keentay in lagu guuleysan waayo joojinta qaadka ayaa ah in qaadka ay isticmaalaan masuuliyiinka heerarka kala duwan ee maamulka. Tani waxay caqabad ku ahayd xakameynta ganacsiga ay wadaagaan dhammaan dowlad-goboleedyada. Dowlad goboleedkan ayaa sidoo kale leh awood iyo tasiilaad xaddidan ama liita oo lagula socdo dhaqdhaqaaqa xuduudaha. Tusaale ahaan, ma jiraan qalab difaac shaqsiyadeed oo ay isticmaali karaan xirfadlayaasha caafimaadka ee loogu tala galey in ay la socdaan dhaqdhaqaaqa xuduudaha iyo dadka ka imanaya Itoobiya ama waa ay xaddidan yihiin. Hirshabeelle iskuma dayin inay soo rogto tallaabooyin lagu yareynayo isu imaatinka dadweynaha. Masaajidda iyo makhaayadaha ayaa weli furan oo aan lahayn wax xaddidaad ah. Dhaqdhaqaaqa dadka ee safarka dhulka ee qeybo kamid ah Hirshabeelle sidoo kale lama xakamayn. Sidaa darteed, waxa suuragal ah in dad badan oo uu ugu dhacay fayraska coronavirus-ka Muqdisho ay u safreen degmooyinka Hirshabeelle ayna faafiyaan fayraska.

Tallaabooyinka maamul ee ay soo rogeen heerarka kala duwan ee dawladda iyo fulintooda guud ahaan ee daciifka ah waxay muujinayaan heerka awoodda hay'adaha qaranka. Ugu horeyn, tallaabooyinka maamul ee dowladda federaalka ay soo rogtey waxaa ay dhaqan gal ka ahaayeen

Muqdisho oo keliya. Tusaale ahaan, bandowga habeenkii ee uu ku dhawaaqay Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa laga hirgeliyey gobolka Banaadir oo keliya. Dowlad goboleedyada kale sida Puntland iyo Koonfur Galbeed waxay ku dhawaaqeen tallaabooyin bandow iyaga u gaar ah. Midda labaad, talaabooyinka maamul ee ay qaateen heerarka kala duwan ee dowladda ayaa ah kuwa kala duwan. Dowladda federaalka iyo dowlad goboleedka Jubaland keliya ayaa amar ku bixiyay in la xiro masaajidada. Hase ahaatee, labadaba way ku fashilmeen sababo la xiriira awood fulineed la'aan iyo diidmada dadweynaha ee xiritaanka goobaha cibaadada, gaar ahaan bisha Ramadaan. Midda saddexaad, in kasta oo dowlad-goboleedyadu leeyihiin xuduudo, haddana ma jirin wax caddayn ah oo muujinaya in labo dowlad-goboleed iyo ka badanba ay iska kaashadeen hirgelinta tallaabooyinka xakameynta faafitaanka fayraska. Waxay tilmaan u tahay in xiriirrada maamul ee u dhexeeya dowladaha – taaso aasaas u ah hirgelinta nidaamka federaalka – aysan jirin.

## U-daadajinta jawaab-celinta ilaa heer degmo

Jawaab celin wax-ku-ool ah ee cudurka faafa ee Covid-19 waxay u baahan tahay dawlado hoose ee ka hortagi kara faafidda fayraska iyo sidoo kale daaweynta bukaanka. Tani waa dhibaato ka jirta Soomaaliya maadaama dowlad goboleedyadu ay daciif yihiin oo aysan u qalabaysnayn jawaab celin. Degmooyin badan si fudud uma heli karaan aaladaha dheecaanka lagu tijaabada sababo la xiriira xaaladda amniga iyo masaafada ay u jiraan caasimadaha dowlad-goboleedyada; waxaa xaddidan helitaanka qalabka ilaalinta shaqsiyadeed ee loogu talagalay xirfadleyda caafimaadka; iyo kaabayaasha caafimaad ee aasaasiga ah oo aan ka jirin degmooyin badan.

Qaar ka mid ah qalabka caafimaadka ee aasaasiga ah ayaa loogu deeqay dowladda federaalka. Dhowr waddan iyo ururo caalami ah ayaa ku deeqay qalab aad loogu baahnaa wax ka qabashada Covid-19. Qalabkan waxaa loo baahnaa in loo qeybiyo degmooyinka si jawaabta ay u noqoto mid baahsan. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ayaa fududeeyay in qalabkaas loo qeybiyo Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka. Inkastoo Wasaaradda Caafimaadku isku dubaridday howlgalka ah in qalab caafimaad la gaarsiiyo dowlad goboleedyada, haddana guddiga qaran ee ka hortagga Covid-19 (eeuu hoggaaminayay Raysal Wasaaraha) ayaa bixinayay jiheyn siyaasadeed; xafiiska Raysal Wasaaraha laftiisuna wuxuu gargaar caafimaad gaarsiiyay degmooyinka. Sikastaba ha noqotee, caqabadaha hortaagan qeybinta iyo baahinta gargaarka ayaa waxaa kamid ah in masiibada ay ku soo beegantay sanad doorasho. Sidookale, siyaasiyiintu waxay daneynayaan inay gaarsiiyaan qalabka caafimaad i deegaannadooda si ay uga helaan awood siyaasadeed.

Maamulka Gobolka Benaadir wuxuu daadejiyey dadaalkiisa wuxuuna dhisay guddiyo heer degmo ah oo ka kooban toddobo xubnoodoo ka kala socda xaafadaha degmo kasta. Gudiyadan waxeey masuul ka yihiin la socoshada xaaladda coronavirus-ka heer degmo. Guddiyadan waxay macluumaadka u gudbiyaan guddiga heer gobol, oo isagana la wadaaga xogta guddiga heer qaran si ay u go'aamiyaan tallaabada la qaadayo. Intaas waxaa sii dheer, maamulka Gobolka Benaadir wuxuu tababaray 40 qofood oo lagu xushay khibradooda caafimaad kana kala yimid degmooyinka

kala duwan ee Benaadir si ay uga qaybqaataan ololaha wacyigelinta degmooyinkooda.

Puntland, dowladaha hoose ee Bosaaso, Gaalkacayo iyo Garoowe waxay ka hirgeliyeen goobo gacmo-dhaqasho oo degdeg lagu yagleelay meelaha caanka ah ee magaalooyinkaas oo laysugu yimaado. Intaa waxaa dheer, ganacsiyada degmooyinka Puntland waxaa lagu amray inay dhigaan agabka nadaafadda sida jeermis dilaha gacmaha iyo goobo gacmaha lagu dhaqo iridda hore ee meheradohooda, inkastoo arrinkan aanan si fiican loo hirgelin. Tallaabooyinka lagu kala fogeynayo bulshada ayaa la dhiirrigeliyey, dowladda hoose ee Garoowe ayaa makarafoonno waaweyn ku rakibtay gawaari yaryar oo magaalada dhex socday, si sare loogu qaado wacyiga bulshada ee ka hortagga faafidda fayraska.

Degmooyinka iyo magaalooyinka waaweyn ee Jubaland waxay sameeyeen guddiyo isku duba rida ka jawaabista iyo xakamaynta coronavirus. Howlwadeennada caafimaadka ee ka socda Wasaarada caafimaadka Jubaland, iyo hay'adda socdaalka aduunka ee IOM ayaa ka hirgeliyay xarumo lagu baaro dadka ku sugan xuduudaha guud ahaan Jubaland. Xarumo karantiil ah ayaa laga sameeyay degmooyin iyo magaalooyin xuduud la leh dalalka deriska ah ee Kenya iyo Itoobiya. Intaa waxaa dheer, Wasaaradda Caafimaadka ee Jubaland ayaa sidoo kale tababar ku siisay kooxo wacyigelin ah magaalada Kismaayo.

Maamulka Koofur Galbeed, waxaa jira dadaallo loogu daadajinayo ka jawaabista Covid-19 ee degmooyinka dowlad-goboleedka, laakiin dadaalladaasi waa kuwo xaddidan. Tusaale ahaan, waxaa jira dadaallo lagu doonayo in laga sameeyo xarumo karantiil degmooyinka waaweyn ee gobolka. Illaa iyo hadda, keliya hal xarun ayaa laga furay magaalada Baydhabo halka dayactirka xarumaha kale ee karantiilka ay socoto. Maaddaama taageerada gobolku helo ay kooban tahay, inta badan kaalmada la siiyo waxay ku urursan yihiin magaalooyinka waawayn sida Baydhabo, – caasimadda kumeelgaarka ah ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed. Wasaaradda Caafimaadka Koofur Galbeed waxay sameysay xarun ay wici karaan dadka ku dhaqan magaalada Baydhabo. Qof kasta oo kasoo wac lambarkan min Yeed ilaa Afgooye wuxuu si toos ah ugu xirmayaa xaruntan wicitaan ee Baydhabo. Wasaaraddu waxay sidoo kale gaysay kooxo jawaab degdeg ah ka bixiya meelaha lagasoo galo degmooyinka qaar. Tusaale ahaan, Baydhabo waxay leedahay saddex meelood oo lagasoo galo: waddada ka timaadda Berdaale – oo ay adeegsadaan inta badan dadka ka imanaya Kenya; wadada ka timaada Ceel-Barde – oo inta badan ay isticmaalaan dadka ka imanaya Itoobiya iyo Bakool; iyo wadada ka timaada magaalada Muqdisho – oo inta badan ay isticmaalaan dadka ka yimaada Muqdisho iyo Shabeelada Hoose. Kooxaha jawaabta degdegga oo ka kooban 4 qofood oo isugu jira saraakiisha caafimaadka ee gobolka, saraakiisha caafimaadka ee degmada iyo abaabulayaasha bulshada ayaa la geeyay halka lagasoo galo saddex gobol. Norwegian Refugee Council (NRC) iyo Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) ayaa gunnooyin dhiirogelin ah siiya abaabulayaasha bulshada.

Galmudug, xarumaha karantiilka waxaa laga furay Gaalkacayo, Cadaado iyo Caabudwaaq si gacan looga geysto gooni yeelidda bukaannada cudurka qaba iyo yareynta faafitaanka cudurka ee bulshada. Wasaaradda Caafimaadka ee dowlad-

goboleedka waxay tababar la xiriira Covid-19 siisay shaqaalaha caafimaadka ee ka howlgala xarumaha caafimaadka ee ku yaal degmooyinka Galmudug si kor loogu qaado wacyiga dadka imaanaya xarumahooda iyo bulshada inteeda kale. Bulshooyinka ku nool guud ahaan Galmudug waxay abaabuleen kooxo dhalinyaro ah si ay gacan uga geystaan wacyigelinta bulshada ay kasoo jeedaan ee Covid-19. Waxaa la sameeyay guddi ka shaqeeya Coronavirus ee heer degmo oo ka kooban gudoomiyaha degmada, ganacsatada, haweenka iyo culumaa'udiinka si ay u abaabulaan bulshada si wax looga qabto Coronavirus-ka iyagoo la shaqeynaya Wasaaradda.

Hirshabeelle, sida dowlad-goboleedyada kale, baahinta ka jawaabista Covid-19 ee degmooyinku way xaddidan tahay. Xarumaha karantiilku waxay ku yaalaan keliya Jowhar iyo Beledweyne. Qalabka baaritaanka waxaa laga heli karaa oo keliya Jowhar iyo Beledweyne. Tan macnaheedu waxa weeye ka jawaabista Hirshabeelle ee Covid-19 waa mid ku kooban keliya labada magaalo ee waaweyn ee maamul-goboleedka. Degmooyinka intooda kale, oo leh kaabayaal daryeel caafimaad xaddidan ama aan lahayn, lama gaari karo. Gobolku wuxuu ku tiirsan yahay taageerada iyo tas-hiilaadka caafimaadka ee ka yimaada dowladda federaalka iyo hay'adaha caalamiga ah. Beledweyne waxaa soo maray daadad intii lagu jiray xaaladdii Covid-19. Dadkii ku noolaa magaalada Beledweyne ee ay daadadku barakiciyeen kuma dhaqmi karin tallaabooyinka ka hortagga ee Covid-19 sida is-karantiilidda iyo ka fogaanshaha bulshada.

U daadajinta degmooyinka ee ka jawaabista Covid-19 ee Soomaaliya waxay muujineysaa cillado dhowr ah. Marka hore, wasaaradda caafimaadka ee federaalku ma baahin howlaheeda maadaama aysan lahayn xafiisyo wasaaradeed oo heer degmo ah. Sikastaba ha noqotee, dowladda federaalka ee uu hoggaanka u hayay Xafiiska Raysal Wasaaraha iyo Wasaaradda Caafimaadka ayaa qaaday xoogaa daadajin ah iyagoo ka caawiyey wasaaradaha caafimaadka ee heer dowlad-goboleed inay ka jawaabaan Covid-19. Tan labaad, ku dhawaad dhammaan dowlad-goboleedyada waxay awood u yeesheen oo keliya inay gaarsiiyaan ka jawaabista Covid-19 iyo dadaallada wacyigelinta degmooyinkooda waaweyn, halka degmooyin badan la dayacay. Tusaale ahaan, dadka waayeelka ah ee ku dhimanayay magaalooyinka sida Marko ee Shabeellada Hoose, Buulaburte ee Hiiraan, iyo Cadaado ee Galmudug ayaa kordhay bishii May 2020. Dadku waxay rumeysnaayeen in Covid-19 uu sabab u yahay dhimashadaas, laakiin ma jirin baahin adeeg caafimaad ee loo sameeyay magaalooyinkan. Maadaama duullimaadyada gudaha la joojiyey bukaanadan ma imaan karin Muqdisho si ay u helaan daaweyn. Midda saddexaad, dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyadu midkoodna ma abaabulin ama ma uusan ka raadsan taageero dhaqaale ganacsatada iyo hay'adaha kale ee aan dowliga ahayn. Sidoo kale, dadaallada jawaab celinta ee ururada aan dowliga ahayn iyo ganacsatada way xaddidnaayeen. Tan waxaa loo fasiran karaa natiijada diidmada ah ee jiritaanka Coronavirus ama fikradda ah in ka jawaabista masiibada ay tahay mashruuc dowladda federaalku wadato ayna hagaan oo ay maalgelinayaan hay’ado caalami ah.

## Isuduwidda, Isgaarsiinta iyo Wadashaqeynta

Kooxda qaran ee uu hogaaminayo Raysal Wasaarihii hore ee Soomaaliya Xasan Cali Khayre ayaa ah habka iskuduwida ugu weyn ee ka jawaabista Covid-19. Wasiiro ka tirsan xukuumadda iyo wakiillo ka socda bulshada rayidka ah, rugta ganacsiga, culimada diinta iyo ururada caafimaadka ayaa xubno ka ah guddiga qaran ee hawsha u xilsaaran. Xubnaha guddigaani waxay kulmi jireen habeen kasta markii kiisaska Covid-19 ay ahaayeen heerkii ugu sareeyay. Waxay leeyihiin guddi-hoosaadyo dhinacyada saadka, dabagalka, taakuleynta dadka nugul, abaabulka dhaqaalaha iyo wacyigelinta. Hoggaanka guddi-hoosaadyadan ayaa inta badan kulammada fiidkii warbixin ka siiya xubnaha kale ee ku jira guddi-howleedka qaranka. Mararka qaar madaxweynayaasha qaar kamid ah Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka ayaa ka qeyb gala kulamada fiidkii ee ku qabsooma baraha fogaan aragga.

Gobolka Benaadir, duqa Muqdisho wuxuu xubin ka yahay guddiga qaran ee loo xilsaaray. Intaa waxaa dheer, guddi-howleed heer gobol ah oo ka kooban 15 xubnood oo ka kala socda waaxyaha kala duwan ee maamulka ayaa la sameeyay si ay warbixin uga siiyaan Guddiga Qaranka ee Covid-19 xaaladda cudurka ee Gobolka Banaadir. Sidoo kale 17-ka degmo ee gobolka Benaadir waxay dhiseen guddiyo heer degmo ah oo ka kooban 7 xubnood oo ka socda degmo kasta si ay ula socdaan xaaladda cudurka ee degmooyinkooda una soo gudbiyaan macluumaadka guddiga heerka gobol oo iyagana usii gudbinaya guddiga qaran.

Qabanqaabada isuduwidda ayaa laga sameeyay dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka. Puntland waxaa ka jira guddi heer wasiir ah. Gudiga Covid-19 wuxuu si joogto ah warbixin u siin jiray warbaahinta si ay bulshada ugu wargeliyaan kiisaska la baaray iyo kuwa laga helay cudurka iyo dimograafigooda. Guddiga ayaa sidoo kale mararka qaarkood ka wada hadlay saameynta uu Covid-19 ku yeeshay dhaqaalaha iyo sida dowladda ay isugu dayayso inay yareyso waxyeellada. Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland, oo ay wehliso hey'adda caafimaadka adduunka ee WHO, ayaa hawlgeliyey Kooxda Taageerada Maareynta Dhacdooyinka (IMST) si ay ula tacaalaan Covid-19.

Dawlad goboleedka Jubaland ayaa dhistay guddi loo xilsaaray ka jawaabista Covid-19. Guddigu wuxuu ka koobnaa saraakiil dowladeed oo ka socday qaybaha ay khuseyso iyo xubno ka socday bulshada rayidka ah. Waxaa hogaaminayay wasiirada caafimaadka iyo arrimaha gudaha. Waxay isku duba ridaan dhammaan howlaha la xiriira ka hortagga iyo ka jawaab celinta Covid-19. Waxay sidoo kale kormeeraan sida uu maamulku uga jawaab celinayaan Covid-19. Kooxda hawshan loo xilsaaray sidoo kale waxay si dhow ula shaqayeen dowladda federaalka. Guddigu wuxuu kaloo warbixin ka bixiyaa wixii kusoo kordha kiisaska coronavirus oo ay ku jiraan kiisaska cusub. Intaas waxaa sii dheer, inta badan degmooyinka guud ahaan Jubaland waxay kaloo sameeyeen guddiyo heer degmo oo isku mid ah kuwaasoo sameeya olole wacyigelin, iyagoo kala shaqeynaya maamulka Jubaland iyo guddiga dowladda federal ka ah ee ka jawaab celinta Covid-19 hadii ay jiraan kiisas ama xogo cusub.

Madaxweynaha Maamulka Koonfur Galbeed ayaa magacaabay guddiga ka jawaab celinta ee Covid-19, oo ka koobnaa 5 wasiir iyo

gudoomiyeyaasha 3-da gobol ee maamulkaasi oo kala ah Baay, Bakool iyo Sh /Hoose. Guddigu waxaa gudoomiye u ah wasiirka caafimaadka. Wasaaradda Caafimaadka Koonfur Galbeed waxay sidoo kale dhistay guddiga maareynta dhacdooyinka, oo ka kooban NGO-yo iyo shaqaalaha wasaaradda, si jawaab wadajir ah loo sameeyo.

Dhanka Galmudug, guddiyo is barbar socda oo heer dowlad goboleed ah iyo degmooyin dhowr ah ayaa loo sameeyay inay isku dub-baridaan dadaallada ku wajahan ka hortagga aafada. Wasaaradda Caafimaadka Dowlad Goboleedka Galmudug ayaa dhistay guddiga Covid-19 oo loo xilsaaray isku dubaridka la dagaallanka Covid-19. Guddigu waa ubucda xiriirka ee dowladda federal ee Soomaaliya iyo guddiyada maxalliga ah. Guddiyada deg-mooyinka oo ka kooban shaqsiyaad diimeed oo caan ah, ganacsatada, dhalinyarada iyo haweenka ee uu gudoomiye u yahay gudoomiyaha degmo kasta waxay dhabarka u riteen masuuliyadda faafinta wacyiga bul-shada iyo xog-siinta guddiga heer Gobol.

Hirshabeelle waxaa ka jira guddi heer wasiir ah oo u xil saaran Covid-19. 17-kii Maarso, Madaxweynaha Dowlad goboleedka Hirshabeelle Maxamed Cabdi Waare ayaa dhisay guddi ka kooban 5 wasaaradood oo heer dowlad goboleed ah kuwaas oo kala ah Wasaaradda Qorsheynta, Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Diinta, Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo Wasaaradda Warfaafinta. Guddigan waxaa hogaaminayay Wasaaradda Caafimaadka waxayna xog-siin iyo isla agaasinba la leeyihiin Madaxweynaha Hirshabeelle iyo xafiiska ra'iisul wasaaraha ee federaalka. Waxa kale oo jira koox maaraysa dhacdooyinka oo ku sugan Jowhar iyo Beledweyne. Si kastaba ha noqotee, sida kor lagu soo sheegay, guddiyada isuduwidda iyo kooxda farsamada ee Hirshabeelle waxay ku egyihiin oo keliya Jowhar (caasimadda Hirshabeelle), iyo magaalada Beledweyne

Guddiyada heer siyaasadeed iyo farsamo ee heerarka dowlad-goboleedku badanaa kama shaqeeyaan dhammaan dhulka maamul-go-boleedyada hoos yimaada maxaa yeelay maamulkood waxa uu inta badan ku kooban yahay caasimadaha iyo magaalooyinka kale ee waaweyn. Sidoo kale ma jiraan farsa-mooyin isuduwid oo u dhexeeya maamul-lada deriska ah. Tusaale ahaan, Puntland iyo Galmudug ayaa wada maamula magaalada Gaalkacayo. Inkastoo ay juquraafi ahaan isku dheggan yihiin, haddana ma muuqato calaamado muujinaya in labada maamul wada shaqeyn dhanka ka jawaabista Covid-19 leeyihiin. Si lamid ah Galmudug iyo Hirshabeelle; Benaadir iyo Koofur Galbeed, iwm. Intaas waxaa sii dheer, ma jiro nidaam isuduwid abaabulan oo u dhexeeya dow-ladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah Federaalka. In kasta oo isuduwidda noocan oo kale ah ay muhiim tahay, haddana khilaafka u dhexeeya dowldda dhexe iyo qaar kamid ah dowlad-goboleedyada ayaa kaalin ku yeelan kara ku guul-darraysiga sameynta hay'ad isku-duwidda ama xiriirka dowladda-dhexe iyo federaalka oo ka shaqeysa ka jawaab celinta Covid-19.

Marka laga reebo guddiga qaranka u xil-saarnaa Covid-19 ee uu hogaaminayay Ra'ii-sul Wasaaraha, iyo guddiyada ka jiray Punt-land iyo Jubaland, hay'adaha kale ee heer dowlad goboleed ma laha wakiilo ka socda bulshada rayidka, culimada diinta iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, kuwaasoo dhamaantood muhiim u ah dagaalka ka dhanka ah Covid-19. Puntland gudaheeda, shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay gacan ka geysteen dadaallada ka jawaab celinta

COVID-19[5]. Kaqeybgalka hey'adaha gaarka loo leeyahay waa mid muhiim u ah Soomaaliya maadaama dhaqaalaha dowlada iyo awoodda jawaab celintuba ay kooban tahay. Qaar kamid ah shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay taageero u fidiyeen isbitaalka magaalada Muqdisho sida gaarka ah ula tacaalayay COVID-19 ee Martini. Shirkadaha qaar ayaa sidoo kale ku yaboohay taageero maaliyadeed si loola dagaallamo wararka khaldan iyo wacyigelinta. La shaqeynta shirkadaha gaarka loo leeyahay kama muuqato guddiyada ay dhiseen inta badan dowlad goboleedyada.

Hababka isgaarsiinta ee la isticmalay ayaa sidoo kale muujinaya kala duwanaansho sida loo faafiyay kiisaska Covid-19. Wasaaradda Caafimaadka Federaalka waxay si joogto ah bulshada ugusoo gudbineysay warbixinno la xiriira dadka laga helay cudurka, jinsigooda iyo dimogaariga. Warbixintaan kooban waxaa ku jira ah kiisaska dalka oo dhan oo ay ku jirto Soomaaliland. Sikastaba ha noqotee, Soomaaliland iyo Puntland, oo labaduba leh sheybaarro lagu baaro kiisaska Covid-19, ayaa leh qaab u gaar ah oo ay ku faafiyaan natiijooyinka kulana xiriiraan dadweynaha. Warbixintooda kooban waxay raacaysaa qaab lamid ah kan Wasaaradda Caafimaadka ee dowladda dhexe, iyada oo loo marayo shirar jaraa'id, iyo shax lagusoo bandhigayo tirada laga helay iyo da'dooda iyo tusmada jinsigooda. Waxa xusid mudan, warbixinnada kooban ee Soomaaliland iyo Puntland sidoo kale waxaa ku jira tirada dadka la baaray, taasoo dowladda federaalku ka fogaatey faafinteeda. Tan macnaheedu waxa weeye hannaanka xog gudbinta oo ay adeegsadeen maamulada Puntland iyo Soomaaliland waxay leeyihiin faahfaahin ka badan tan ay adeegsatay dowladda federaalka ee Muqdisho. Dowladaha kale ee xubnaha ka ah Federaalka si dhif ah ayey ula xiriiraan dadweynaha maamuladooda. Mid kamid ah sababaha ay dowladaha kale sida liidata ula xiriiraan waxay noqon kartaa in awooddooda baaritaan tijaabinta ee COVID-19 ay daciif tahay.

Intaa waxaa dheer, isku-duwidda iyo wada xariirka dowladda federaalka Soomaaliya, dowlad-goboleedyada, UN-ka iyo ururrada kale ee caalamiga ah ayaa sidoo kale aan nidaamsanayn. Inta badan wuxuu ku saleysan yahay xiriir toos ah oo u dhexeeya dowlad goboleedyada iyo ururada taageera. Waxaa xusid mudan, dowladda federaalka oo uu hormuud u yahay Xafiiska Raysal Wasaaraha ayaa sii waday gargaarka caalamiga ah waxayna u qeybisay qaar kamid ah kaalmadan dowladaha xubnaha ka ah Federaalka. Sikastaba ha noqotee, la xariirka ururada sida ururka caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) iyo hay'adda caafimaadka adduunka (WHO), oo ka caawiya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada dhisidda iyo taageerada farsamo ee kooxaha maareynta dhacdooyinka, dabagalka dhaqdhaqaaqa xuduudaha iyo bixinta qalab caafimaad oo aad loogu baahan yahay, sida qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed, inta badan wuxuu ku saleysan yahay xiriir toos ah oo u dhexeeya dowlad-goboleedyada iyo hay'adahan.

[5] Alsalaam Group, tusaale ahaan, waxay ugu deeqeen 10,000 oo doolar Wasaaradda Caafimaadka Puntland si ay uga taageeraan ka jawaab celinta Covid-19 https://hornpost.net/2020/04/10/shirkadda-al-salaama-oo-lacag-ugu-deeqday-guddiga -ka-hortagga-coronavirus-daawo

## Abaabulka Dhaqaalaha

Gudaha iyo caalamkaba, dhaqaalaha iyo agab kale ayaa la abaabulay si loola dagaallamo Covid-19 ee Soomaaliya. Dowladda federaalka waxay u qoondeysay 5 milyan oo doolar waxayna u adeegsatay lacagtan ka jawaab celinta maalmihii hore kahor inta aan dhaqaale iyo agab kale dibadda kasoo gelin dalka. Dowladda federaalka ayaa sidoo kale lacag dhan nus milyan doolar oo kaash ah siisay mid kasta oo ka mid ah Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka.

Si kastaba ha noqotee, dhaqaalaha iyo qalabka gudaha laga uruuriyay si looga jawaabo aafada ayaa aad u yaraa. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay ku tabaruceen lacago kaash ah iyo alaabo si wax looga qabto cudurka faafa ee coronavirus. Hormuud Foundation waxay ku tabarucday $500,000, oo loo isticmaalay dib-u-dhiska qeybo kamid ah Isbitaalka Benaadir ee dhowaan la furay si loogu adeegsado xarunta lagula tacaalo Covid-19 (Benson, 2020). Shirkadda ayaa sidoo kale soo gaarsiisay 2 ambalaas oo ay isticmaalaan shaqaalaha caafimaadka safka hore. Bangiga Dahabshiil iyo Zamzam Foundation ayaa midkiiba hal ambalaas ugu deeqay cusbitaalka Martini. Shirkadda korontada ee Banaadir (BECO) oo ah shirkadda ugu weyn ee bixisa adeegga korontada magaalada Muqdisho ayaa ugu deeqday matoor koronto dhaliya oo koronto aan kala go 'lahayn siiya cusbitaalka Martiini. Sababta ay dhaqalaaha gudaha ahi ugu yaraayeen waxay noqon kartaa iyadoo Soomaalidu ay inta badan diidaan jiritaanka ama halista fayraska, kala fogaanshaha bulshada iyo is karaankiilka oo aan si ballaaran loo dhaqan gelin.

USAID waxay u qoondeysay uguna deeqday $12.5 milyan si wax looga qabto COVID-19 ee ka dillaacay Soomaaliya iyo $7 milyan oo dheeraad ah oo xagga gargaarka bini'aadanimo iyo caafimaad ah[6]. USAID sidoo kale waxay ku tabarucday 350 sariiro caafimaad, 500 oo go'yaasha sariirta ah iyo 20,000 oo af-saab ah oo Soomaaliya lagu sameeyay lana dhigay xarumaha karaantiilka, iyo cusbitaalo kala duwan oo dalka oo dhan[7]. USAID waxay sidoo kale ku deeqday qalab tiknooloojiyadda ah iyo alaab guri oo loogu deeqay xarumaha sheybaarka ee COVIDid-19 oo ku kala yaala Muqdisho iyo Puntland.[8] Dowladda Ingiriiska waxay 38 milyan oo geni ugu deeqday la dagaalanka coronavirus-ka Soomaaliya iyada oo ay lacagtaas mashaariic ku fulinayaan IOM, WFP, WHO, iyo UNICEF. Bangiga Adduunku wuxuu Soomaaliya u ansixiyay $137.5 milyan si looga jawaabo caqabadaha ka imanaya Covid-19 iyo daadadka (World Bank, 2020).

Turkigu wuxuu keenay agab caafimaad oo muhiim u ah xakamaynta faafitaanka coronavirus. Laba duullimaad oo isku xigay, Turkigu wuxuu ku keenay kuna deeqay qalabka neefsiga, agabka baaritaanka, caafimaad, waji dabool, iyo qalabka difaaca[9]. Imaaraadku wuxuu keenay diyaarad xamuul ah oo siday in ka badan 35 tan oo gargaar iyo qalab caafimaad ah si loola dagaallamo 'coronavirus' waxayna siisay agab gargaar dadka ay fatahaaduhu saameeyeen[10].

[6]Arinta waxaa lagu sheegay qoraal la dhigay Twitter-ka https://twitter.com/USAIDSomalia/status/1245591828486750208?s=20

[7] Faah faahin dheeri ah, aqri war saxaafadeedka kasoo baxay safaaradda Mareykanka https://so.usembassy.gov/united-states-bolsters-somalia-covid-19-response-with-donation-of-350-hospital-beds/

[8] Ka eeg sawirka halkaan https://twitter.com/USAIDSomalia/status/1265630141184651267?s=20

[9] hereWaxaad ka eegi kartaa sawirada agabka caafimaad.https://twitter.com/TC_Mogadishu/status/1257307235148955653?s=20

[10] Faah faahinta arinkaan waxaa laga heli karaa wab seytka wasaaradda arimaha dibadda ee Imaaraatka

Deeqdaas sidoo kale waxaa ku jiray 10 mashiinnada neefsiga kaalmeeya, iyo sidoo kale agab kale oo difaaca loo xirto. Urur Goboleedka IGAD ayaa ugu deeqay Soomaaliya jeeg dhan $100,000 oo loogu talagalay la dagaallanka coronavirus. IGAD waxay kaloo soo gaarsiisay Soomaaliya qalab caafimaad oo qiimihiisu gaarayo $175,000. Intaa waxaa dheer, hay'adaha Qaramada Midoobay waxay ugu tabaruceen mashiinnada neefsiga kaalmeeya dowladda federaalka. Dhawaan ayaa Ururka Iskaashiga Islaamka (OIC) waxa uu $50,000 ku wareejiyay Wasaaradda Caafimaadka[11].

Kaalmooyinkaasi waa ilo dhaqaale oo aad u tiro badan. Inkastoo aan la bixin dhammaan dhaqaalihii ay ballanqaadeen bulshada caalamku ee ku wajahan wax-ka-qabashada COVID-19 ee Soomaaliya, qaarna aysan marin nidaamka dalka ee isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta, agabka iyo isticmaalka lacagtaan ayaa muhiim u noqon doona jawaab wax-ku-ool ah ee COVID -19. Arinta gadaal ayaan ugu hadli doonaa.

Heerka dowladaha xubnaha ka ah dwladda Federaalka, Puntland waxay dhigtay $100,000 koonto loogu talagalay ladagaallanka aafada. Xubnaha ganacsatada ayaa sidoo kale gacan ka gaystay koontadaas. Sikastaba ha noqotee, xaddiga saxda ah ee lacagta lagu shubay koontada iyo sida loo maamulo uma cadda dadweynaha. Intaas waxaa sii dheer, Puntland waxay heshay, shan boqol oo kun oo doolar oo kamid ah milyankii ay dowladda federaalka ugu yaboohday dowladaha xubnaha ka ah Federaalka.

Aruurinta dhaqaaalaha ee dowladaha kale ee xubnaha ka ah Federaalka way yaraayeen, dowlad goboleedyaduna uma aysan qoondeyn miisaaniyado looga jawaabayo Covid-19. Waxay ku tiirsan yihiin dowladda federaalka iyo ururrada caalamiga ah xagga dhaqaalaha, tababarka iyo qalabka. Heerka bulshada, sidoo kale ma jiraan ilo dhaqaale oo muuqda oo la abaabulay. Xaqiiqdii, jawaabta COVID-19 loogama arag mudnaan weyn gobollada qaarkood. Tusaale ahaan, mas'uuliyiinta HirShabeelle iyo bulshada waxay diiradda saareen daadadka oo barakiciyey boqolaal qof oo deggan Beledweyne iyo degmooyin kale ee Hirshabeelle. COVID-19 looma arkin inuu yahay arrin ka jirta Beledweyne marka la barbar dhigo barakaca iyo baahida loo qabo biyo la cabbo iyo hoy.

## Isla xisaabtanka xilliyada xasaradaha

Inta lagu guda jiro xasaradaha sida cudurka faafa ee coronavirus, lacago gaar ah ayaa badanaa la uruuriyaa si wax looga qabto. Tani waxay keentaa doodo iyo su'aalo ku saabsan go'aamada isticmaal ee lacagahaas, sida lacagaha loogu qoondeeyo heerarka kala duwan ee dowladda iyo waxtarka iyo hufnaanta isticmaalka. (Zannath & Gurazada, 2020).

Soomaaliya gudaheeda, lacag gaar ah ayaa loo qoondeeyay ka falcelinta xaalada Covid-19. Waxaa kamid ah qoondaynta gaarka ah ee dowladda, ganacsatada dalka ah iyo dhaqaalaha ka yimaada bulshada caalamka. Intaa waxaa dheer, qalab iyo ilo dhaqaale oo muhiim oo ay ku deeqeen dalal dhowr ah, hay'adaha UN-ka iyo ururo kale oo caalami ah. Hubinta, isu-dheelitirka iyo hufnaanta sida loo isticmaalay ilahaani waa muhiim in la ogaado. Soomaaliya waxay markastaba si

https://www.mofaic.gov.ae/en/media-hub/news/2020/5/12/13-05-2020-uae-support

[11] Eeg qoraalka Twitter-ka wasaaradda arimaha dibadda Sooomaaliya https://twitter.com/mfasomalia/status/1285198783664488449?s=12

isdabajog ah kaalinta kowaad ka gashay oo ay noqotay dalka ugu musuqa badan adduunka sida ay sheegto haya'dda daahfurnaanta adduunka (Transparency International). Aafada Covid-19 ayaa sidoo kale kusoo beegantay sanad doorasho (heer federaal iyo dowlad goboleedka Hirshabeelle), taasoo kor u qaadeysa walaaca laga qabo kutakrifalidda lacagaha Covid-19 ee maalgelinta ololaha doorashooyinka. Dowladda federaalka ayaa horay u xirtay agaasime waaxeedyo ka tirsan Wasaaradda Caafimaadka oo lagu eedeeyay musuqmaasuq; qaar kamid ah shaqaalahan rayidka ah ayaa dhawaan lagu xukumay sanado xarig ah oo kala duwan.

Dowladda federaalka waxay u qoondeysay $5 milyan la tacaalida Covid-19. Inkastoo dowladdu ku wareejisay nus malyuun shanta dowlad-goboleed (wadar ahaan $2.5 milyan), haddana wax badan lagama oga sida dowladda federaalka ay u isticmaashay lacagihii ka haray miisaaniyaddeeda gaarka ah ee ay Covid-19 u qoondaysay. Intaas waxaa sii dheer, ma jiraan macluumaad la heli karo oo ku saabsan sida loo isticmaalay nus malyuun-ka doolar ee la siiyey shanta dowlad goboleed.

Soomaaliya waxay leedahay dhowr hay'adood oo loo igmaday inay hubiyaan la xisaabtanka laamaha dowladda. Xafiiska Hanti Dhawrka Guud waajibaadkiisu waxaa kamid ah inuu xoojiyo la xisaabtanka dowladda ee maaraynta iyo adeegsiga lacagaha iyo hantida dadweyne ee bulshada. Waxa kale oo jira Guddi baarlamaanka oo qaabilsan Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Kormeerka Maaliyadeed ee Hay'adaha Dowladda kuwaas oo waajibaadkoodu yahay la xisaabtanka isticmaalka lacagaha dowladda. Awoodda Xeer Ilaaliyaha Guud ayay kamid tahay inuu maamulo dacwadaha caddaaladda dembiyada oo ay ku jiraan eedeymaha musuqmaasuqa iyo hubinta ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta. Inkastoo aysan jirin hay'ad gaar ah oo la dagaalanka musuqmaasuqa qaabilsan, maxkamadaha dalka ee soo kabanaya waxay door ka ciyaaraan bixinta caddaaladda shaqsiyaadka lagu eedeeyay inay ku takri-faleen hantida umadda.

Isla xisaabtanka ayaa muhiim ah gaar ahaan xiligaan adage ee Soomaaliya ay la tacalayso cudurka safmareenka ah ee Coronavirus. Ugu horeyn, baarlamaanka federaalka iyo xafiiska hanti dhowrka guud waxay weydiin karaan dowladda federaalka su'aalo ku saabsan sida deeqaha iyo lacagta dibadda loo qeybiyay. Dowladda federaalka ayaa kiraysatay diyaarado waxayna u qeybisay qalab caafimaad degmooyin. Wax yar baa laga ogyahay amaba waxbaba lagama oga sida dowladda federaalku u go'aansatay agabka ay u qoondeysay degmo walba iyo waxtarka iyo hufnaanta qaabka ay wax ku wajahday. Marka labaad, waa muhiim in la fahmo sida loo kharash gareeyay lacagaha yar loona mareeyay agaabkii caawineed ee loogu tala galay falcelinta Covid-19 ee ay heleen dowlad goboleedyada. Tani waa waajibka koowaad ee saaran goleyaasha barlamaanka heer dowlad-goboleed, laakiin dowladda federaalka, oo iyadu bixisay lacagta iyo sidoo kale baarlamaanka federaalka ah, ayaa sidoo kale dabagal ku sameyn karta sida loo maareeyay dhaqaalahaas/deeqahaas. Si loo fahmo maareynta lacagta Covid-19 ee heer federaal iyo heer dowlad goboleedba, Xarunta Horumarinta iyo Cilmibaarista Puntland (PDRC) waxay soo jeedisay in la dhiso guddi ka kooban 15 xubnood oo madax banaan oo kormeera arrimaha isticmaalka deeqaha Coronavirus lehna qaab dhismeed lamid ah Guddiga Maamulka Maaliyadeed

(Bile, Shire) , & Hussein, 2020). Inkastoo guddigu keeni karo hufnaan iyo isla xisaabtan horumarsan, aasaaskiisa ayaa haddana qaadan kara waqti dheer. Midda saddexaad, bulshada rayidka ah gaar ahaan warbaahinta iyo haya'daha cilmibaarista waa inay kormeeraan oo ay baaraan sida lacagaha gaarka ah ee loo qoondeeyey ka jawaabista Covid-19 loo isticmaalay illa haddana loo isticmaalayo.

## Gaabiska jira

Cudurka safmareenka ah ee coronavirus wuxuu daaha ka qaaday jilicsanaanta iyo daciifnimada hay'adaha dowliga ah ee Soomaaliya. Nidaamyada caafimaadka ee dalku waxay ku jiraan marxalad bilow ah waxaana adeegyada caafimaad inta badan bixiya xarumo gaar loo leeyahay. Waxaa jira dhowr waxyaalood oo maqan oo soo muuqday intii lagu jiray aafada Covid-19. Ugu horreyn, waddanku ma lahan hay'addo si habboon u shaqeeya oo mas'uul ka ah ka-hortagga iyo ka-jawaab-celinta fayraska. Machadka Caafimaadka Qaranka si buuxda uma shaqeeyo. Ma jirin shaybaarro awood u leh in lagu baaro fayrasyada sida Covid-19, taasoo kalliftay in markii hore loo diro baaritaanka shaybaarro dibadda ah si loo soobaaro.

Midda labaad, xaalado deg deg ah oo badan ayaa ka jira Soomaaliya. Hase yeeshe, ma jirto hal xarun qaran oo qabata adeegyada deg-degga ah oo shaqeyneysa waxna ka qaban karta xaaladaha sida cudurka safmareenka ee Covid-19. Markii in ka badan 500 oo qofood ay ku dhinteen qaraxii isgoyska Zoobe ee 14-kii Oktoobar 2017 ka dhacay magaalada Muqdisho, waxaaa bannaanka usoo baxday sida Soomaaliya aysan ugu diyaarsaneyn xaaladaha degdegga ah. Inkastoo ay jireen dadaallo horay loo sameeyay si xarun deg-deg ah oo heer qaran ah loo sameeyo kana jawaabta dhacdooyinka noocan oo kale ah, haddana dowladdu kuma guuleysan inay hawlgeliso xarun noocan oo kale ah. Waxa kale oo jira xaalado deg-deg ah oo xilliyada qaarkood ah sida fatahaado, abaaro, iyo kuwo kale oo xarun noocan oo kale ah ay ka jawaabi karto.

Midda saddexaad, ma jirin wax abaabul hay'adeed ama habab maamul oo looga jawaabo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka bulshada. Tani waxay ka muuqataa guddiyada kala duwan ee heer federaal iyo heer maamul goboleed iyo hay'ad kasta oo dowladeed oo ka shaqaynaysa ka jawaabista coronavirus. Waxa kale oo meesha ka maqan waa xiriirka ka dhexeeya dowladaha kaasoo hagaajin kara isku xirnaanta iyo wada shaqeynta heerarka kala duwan ee dowladda. Qodobka 111 (f) ee Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah wuxuu farayaa in la dhiso Guddiga Iskuxerka. Guddiga dib-u-eegista dastuurka sanadkii 2016 waxay ku taliyeen in la sameeyo xafiiska isku-dubbaridka oo hoos imaanaya Xafiiska Madaxweynaha kaasoo beddelaya guddiga uu farayo dastuurka (Somali Public Agenda, 2019). Guddiga iyo xafiiska isuduwida midna lama dhisin. Haddii uu guddigan dhisnaan lahaa waxa uu gacan mug leh oo wax-ku-ool ah ka geysan lahaa isuduwidda la dagalanka Covid-19.

Midda afaraad, cudurka safmareenka ee Covid-19 wuxuu lagama marmaan ka dhigay in la hello jawaab baahsan maadaama fayrasku ku faaftay waddanka oo dhan. Meelo badan, dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyaduba waxay ku fashilmeen inay baahiyaan adeegga naf-badbaadinta islamarkaana gaarsiiyaan degmooyinka. Marar kale, dowladda federaalka ayaa si keli keli

ah u gaarsiisay taageero caafimaad degmooyinka qaar. Intaas waxaa dheer, xiriirka dowladda-dhexe kala dhexeeya dowlad-gobolleedyada ayaa ahaa mid liita. Tani waxay markaa su'aal galinaysaa jiritaanka nidaamka federaalka ee hadda jira.

Ugu dambeyntiina, Coronavirus ayaa ah mid kamid ah dhibaatooyin badan ee ka jira Soomaaliya. Hay'adaha waddanku waxay la tacaaleen Covid-19 iyadoo ay sidoo kale jiraan caqabado kale oo culeys leh oo ay kamid yihiin daadadka gobollada qaar, saameynta ayaxa, barakacayaasha, amni darrada, doorashooyinka, xiriirka liita ee u dhexeeya Dowladda dhexe iyo gobolka gobolada, iyo kuwo kale oo badan. Ahmiyadahan kale ee muhiimka ah ayaa sidoo kale saameyn taban ku yeeshay jawaab-celinta dowladnimo ee khatarta Covid-19. Arrintu waxaa sii murgiyay ismaandhaaf baahsan oo shaki galinaaya halista ka dhalan karta Coronavirus. Macno ahaan, tani lafteeda ayaa sidoo kale la xiriirta la'aanta awood dowladeed: Awood la'aanta mas'uuliyiinta inay sameeyaan baaritaan ballaaran, oo nidaamsan guud ahaan Soomaaliya waxay ka dhigan tahay in tirada la xaqiijiyay kiisaska iyo dhimashadu ay weli ka hooseyso tirada dhabta ee safmareenka u dhimatay ama uu ku dhacay. Taa baddalkeeda, tani waxaa suuragal ah in ay ka qeyb qaadatay yaraysiga dhibaatada Covid-19 ee mas'uuliyiinta qaarkood iyo la'aanta hawlgallo ka hortag iyo daaweyn joogto ah oo loo fidiyo dadweynaha.

## Gunaanad

Cudurka safmareenka ee Covid-19 wuxuu ku faafay Soomaaliya oo dhan wuxuuna mar kale kashifay jilicsanaanta hay'adaha dowliga ah. Waxaa jira shaybaarro yar oo loo isticmaali karo in lagu baaro cudurka Covid-19. Tirada dadka la baaray ayaa tiro ahaan aad u yaraa, tirada laga helay, iyo tirada dhimashada ee la soo sheegay waxay u egtahay inaysan ka tarjumaynin tirada dhabta ah ee dadka uu ku dhacay fayraska iyo dhimashada dhabta ah ee uu sababay coronavirus. Guddiga heer Qaran ee Covid-19 tamartiisu waxay ahayd mid aad u yar, kaliyana ku eg Muqdisho, caasimadaha dowlad-goboleedyada iyo magaalooyin kale oo waaweyn. Inkastoo dhowr tallaabo oo maamul ay ku dhawaaqeen dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka, haddana tallaabooyinkan si liidata ayaa loo dhaqan geliyey sababtoo ah awoodda fulinta ee hay'adaha dowladda ayaa daciif ah. Waxaa jiray xoogaa taageero maaliyadeed iyo mid agab ah oo loogu tala galay la tacalida xaladda Covid-19, balse daahfurnaan badan ma jirin qaabka islaxisaabtankana ma ahayn mid cadaynaya sida wax loo isticmaalay. COVID-19 wuxuu noqday mid kamid ah arrimaha culus ee mudnaanta ay siiyeen hay'adaha dowliga ah ee Soomaaliya. Hal cashar oo muhiim ah oo laga bartay musiibada ayaa la xiriirta baahida loo qabo dhisidda hay'adaha dowliga ah iyo gaarsiinta adeegyada bulshada. Aafada waa lasoo afjari karaa, laakiin waxay ku dhiirigelin kartaa hoggaamiyeyaasha inay maalgeliyaan kordhinta helitaanka iyo tayada adeegyada bulshada ee Soomaaliya.

## Talooyin tixgelin muddan

**Maalgelinta caafimaadka:** Faafida Covid-19 kahor, miisaaniyadda guud ee daryeelka caafimaadku way hooseysay, inkastoo uu ku dhacayay koror: $4.4 milyan sanadkii 2018, $7.3 milyan sanadkii 2019 ilaa $9.4 milyan miisaaniyada sanadka 2020 (Somali Public Agenda, 2020). Waa wax lagu farxo in miisaaniyadda caafimaadka si weyn loo kordhiyay miisaaniyadda dhowaan dib-u-eegista lagu sameeyay oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada. Miisaaniyadda dib-u-eegista lagu sameeyay waxay muujineysaa in miisaaniyadda Wasaaradda Caafimaadka iyo fal-celinta xanuuna Covid-19 ay gaarayaan $31.9 milyan, taasoo u dhiganta in $22.4 milyan la kordhiyey. Lacagaha noocan ah waa in lagu maalgeliyaa aasaasidda iyo xoojinta hay'adaha caafimaadka bulshada ee muhiimka ah. Awoodda Machadka Caafimaadka Qaranka ayaa si weyn kor loogu qaadi karaa. Intaa waxaa dheer, ugu yaraan hal isbitaal dowladeed oo leh qalabka lagama maarmaanka ah iyo xirfadlayaal caafimaad ayaa laga asaasi karaa dhammaan magalaao madaxyada dowlad-goboleedyada iyo Muqdisho. Covid-19 wuu u muuqdaa inuu dhammaan doono, laakiin waa inuu calaamad u noqdaa isbeddelka dowladda ee ku aaddan hirgelinta in la helo daryeel caafimaad.

**Go'aan wadar ogol ah:** Guddiyada loo xilsaaray Covid-19 ee ka hawlgala heerarka kala duwan ee dowladeed ee ka jira Soomaaliya guud ahaan waxay muujinayaan inay ahayeen kuwo aysan u dhamayn qeybaha kala duwan ee bulshada. Guddiyada saddex dowlad goboleed waxaa ay ahaayeen keliya heer wasiir, qeybaha muhiimka ah ee bulshada oo ay ku jiraan bulshada rayidka ah, ganacsatada iyo culimada diinta midkoodna laguma darin. Markii lala tacaalayo safmareenka sida Covid-19 oo aad haysatid dhaqaale yar iyo hay'ado dowladeed oo daciif ah, dadaallada wadajirka ah ayaa lagama marmaan noqda. Go'aannada iyo tallaabooyinka siyaasadeed waxaa si iskood ah u qaadatay dowladda iyadoo wax yar ama aan wax talo ah laga siin qeybaha kala duwan ee bulshada kuwaas oo go'aanka uu saameyn ku yeelanayo. Dowladdu waa inay ogaataa saamaynta dhinacyada badan leh ee uu leeyahay Covid-19 islamarkaana ay raadiso taageerada bulshada oo dhan.

**Xiriirka dowladaha**: daraasadda ayaa daaha ka rogtay xiriirka liita ee u dhaxeeya Dowlada Federaalka iyo Dowlad-Goboloyeedyada iyo waliba dwlad-goboloyeedyada dhexdooda.. Ma jirin xafiis isku-duwidda ama guddi loo sameeyay si ay si fiican isugu dubaridan xal-u-helidda Covid-19. Hal sabab oo xiriirka dowladda dhexe iyo maamul goboleedyada u xumaa waxay noqon kartaa khilaafka u dhexeeya Muqdisho iyo qaar ka mid ah Dowlad Goboleedyada. Covid-19 waxuu muujiyay baahida degdegga ah ee loo qabo in la sameeyo hay'ad iskuduwidda arrimaha masiibooyinka ka shaqaysa si guudna uga madaxbannaan siyaasadda. Xiriirka dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah oo wanaagsanada wuxuu gacan ka geysanayaa isu-duwidda kaalmada caalamiga ah iyo midda maaliyadeed ee lagula dagaallamayo coronavirus iyo aafooyinka kale ee dabiiciga ah ee ka jira Soomaaliya.

**Baahinta adeegyada bulshada:** inkastoo cudurka Covid-19 uu ku faafay dalka oo dhan, helitaanka daaweynta ayaa ku koobnayd oo keliya magaalooyinka waaweyn. Dowladda federaalka waxay dadaalkeeda oo dhan isugu geysay Muqdisho, halka dowlad-goboleedyadu ay ku guuleysteen inay

gaaraan oo keliya laba illaa saddex degmo oo waaweyn oo hoos yimaada maamulladooda. Muwaadiniin badan oo ku degmooyinka daafaha ee dalka ayaan helin daryeel caafimaad oo aasaasi ah. Tani waxay ka tarjumaysaa ilowshaha dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada ee degmooyinka iyo magaalooyinka durugsan. Mid kamid ah waxyaabaha koowaad ee riixayay in la helo maamul baahsan wuxuu ahaa baahi dhab ah oo loo qabo baahinta adeegyada aasaasiga ah (Elmi, 2014). Dowladda federaalka, dowlad goboleedyada iyo sidoo kale beesha caalamka waa inay si wadajir ah mudnaanta u siiyaan baahinta adeegyada aasaasiga ah ee dowladda ee degmooyinka durugsan. Muwaadiniinta degmooyinkan iyaga oo sii maraya wakiilladooda heer gobol iyo heer federaal waa inay sidoo kale dalbadaan helitaanka adeegyada dowladda

**Daahfurnaan iyo isla xisaabtan:** qalab iyo ilo dhaqaale ayaa la ballanqaaday laguna biiriyay ka falcelinta cudurka Covid-19. Waxaa muhiim u ah muwaadiniinta inay ogaadaan sida loo gaaray go'aannada siyaasadeed ee la xiriira qeybinta kheyraadkan, waxtarkiisa iyo sidoo kale wax-ku-oolnimada go'aannadan. Daahfurnaanta kharashyada danta guud ee la galay gaar ahaan kuwa la xiriira Covid-19 ayaa muhiim u ah sii qorshaynta in falcelin hagaagsan mustaqbalka loo diyaar garoobo. Hay'adaha federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada ee loo igmaday inay hubiyaan oo ay la xisaabtamaan hay’adaha fulinta waa inay bilaabaan inay door muhiim ah ka ciyaaraan horumarinta isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta iyagoo baaraya qoondaynta lacagaha Covid-19. Waqtiga dhow, bulshada rayidka ah gaar ahaan warbaahinta iyo hay’adaha cilmibaarista waa inay sidoo kale kormeeraan oo ay baaraan sida loo isticmaalay dhaqaalaha iyo agabka Covid-19.

## Tixraac

Abdullahi, A., & Sharif, M. (2020, June 4). *The impact of Covid-19 on the informal economy of Mogadishu.* Retrieved from Somali Public Agenda: https://somalipublicagenda.org/the-impact-of-covid-19-on-the-informal-economy-of-mogadishu/

Benson. (2020, May). *Somalia's Hormuud Telecom donates $2M towards COVID-19, partners Health Ministry to combat fake news and misinformation.* Retrieved from https://www.techinafrica.com/somalias-hormuud-telecom-donates-2m-towards-covid-19-partners-health-ministry-combat-fake-news-misinformation/

Bile, D. K., Shire, D. A., & Hussein, D. B. (2020). The Existential Threat of COVID-19 in Somalia. *Puntland Development and Research Center*, p. 44.

Elmi, A. A. (2014). Decentralization Options for Somalia. *Heritage Institute for Policy Studies*, 2.

Hassan, M. (2020, May 15). *Coronavirus is threatening not only lives but also livelihoods in Somalia*. Retrieved from https://mowliidnotes.com/2020/05/15/coronavirus-is-threatening-not-only-lives-but-also-livelihoods-in-somalia/

International Organization for Migration. (2020, May 9). COVID-19 Preparedness and Response. *MISSION UPDATE 7*, pp. 1-6.

Irbad, M. (2020, May 2). *How stigma is holding back the fight against Coronavirus in Somalia*. Retrieved from Somali Public Agenda: https://somalipublicagenda.org/how-stigma-is-holding-back-the-fight-against-coronavirus-in-somalia/

Majid, N., Hassan, S., Koshin, S. A., Musa, A. M., & Abdirahman, K. (2020, May 5). *Puntland and COVID-19: Local Responses and Economic Impact*. Retrieved from London School of Economics and Political Science: https://blogs.lse.ac.uk/crp/2020/05/05/puntland-and-covid-19-local-responses-and-economic-impact/

Somali Public Agenda. (2019, June). Division of powers and responsibilities in a federal Somalia. *Governance Brief*(3), 2.

Somali Public Agenda. (2020, February 9). *Review of 2020 federal government budget for security, economic growth and public services*. Retrieved from https://somalipublicagenda.org/review-of-2020-federal-government-budget-for-security-economic-growth-and-public-services/

UNFPA. (2020, April 27). *UNFPA and WHO partner to strengthen testing capacity for COVID-19 in Somalia*. Retrieved from https://somalia.unfpa.org/en/news/unfpa-and-who-partner-strengthen-testing-capacity-covid-19-somalia

World Bank. (2020, May 15). *World Bank Approves $137.5 Million for Somalia's Response to COVID-19, Floods, and Drought*. Retrieved from https://www.worldbank.org/en/news/press-release/2020/05/15/world-bank-approves-137-5-million-for-somalias-response-to-covid-19-floods-and-drought

Yusuf, F. I. (2020). Examining the impact of COVID-19 on higher education in Mogadishu. *Somali Public Agenda*, 1-4.

Zannath, S., & Gurazada, S. (2020, May 6). *Advancing Accountability for Special Emergency Funds to Address COVID-19*. Retrieved June 1, 2020, from https://blogs.worldbank.org/governance/advancing-accountability-special-emergency-funds-address-covid-19

www.somalipublicagenda.org
info@somalipublicagenda.org